

“Samo ku waar Samo ku waar Somaliland”

Raadraaca Sooyaalka 26-ka June 1960 iyo 18-ka May 1991 ee Jamhuuriyadda Somaliland

Qalinkii: Maxamed Baashe Xaaji Xasan

Tafatirkii: Axmed Ismaaciil Cabdi (Xaaji)

Taariikhdu waa inoo musbaax maanka caawimo’e

Adoo male gudaayaad yaqiin marar ku gaadhaaye

Makaankaaga waa inaad taqaan meelba waxa yaal!

Xaaji Aadan Axmed Xasan (Afqallooc)

5/18/2015

Hordhac

Raadraaca Sooyaalka 26-ka Juun iyo **18-ka May ee Somaliland** waxa uu koobayaa taariikh duug ah oo ka soo bilaabmay:

- *Taariikhdii Somaliland ee ka hor soo gelitsaanka gumaysiga*
- *Soo Geliddi iGumaysiga iyo Halgankii Xornimo-doonka Somaliland,*
- *Xornimadii Somaliland ee 26-kii Juun 1960-kii,*
- *Israacii Labadii Waddan ee Somaliland iyo Soomaaliya ee 1960-kii ,*
- *Inqilaabkii Dhicisoobey ee Midnimada ka dib iyo Diidmadii Aftida Distoorka,*
- *Afgambigii Milatari ee Kacaankii Maxamed Siyaad Barre,*
- *Halgankii Ururkii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed ee SNM,*
- *Dibu Dhalashadii Somaliland ee 1991 iyo*
- *Hanaqaadka Dawladihii Kala Dambeeyay ee Somaliland 1991 - 2015.*

Ugu dambayntii taxanaha buuggani wuxuu ku soo afmeermayaa xaaladihii siyaasadeed ee Somaliland ka aloosnaa badhtamihii sannadkii 2015.

Arrinta Siyaasadeed ee ugu weyn ee xilligan taagnaa ayaa ahayd dibudhacii doorashooyinka xukuumadda iyo goleyaasha Barlamaanka (Guurtida iyo Wakiillada) oo muran siyaasadeed ka dhex abuurey xukuumadda, goleyaasha sharci dejinta iyo asxaabta qaranka.

Qaybta 1-aad:

-Taariikhdu waynoo musbaax maanka caawimo'e
-Adoo male gudaayaad yaqiin marar ku gaadhaaye
-Makaankaaga waa inaad taqaan melba waxa yaal!
Xaaji Aaadan Axmed Xasan (Afqallooc)

"Ummad aan taariikh sugan lahayni waa ummad aan jiritaan sugan lahayn"!

18-ka May waxay ku suntan tahay: ka guurka himiladii is-raac ee Hargeysa iyo Muqdisho iyo ka-hadh-galka raad-goobkii midnimada Soomaaliweyn, waxa aanay u taagaan tahay: dibu-dhalashada iyo jiritaanka Jamhuuriyadda Somaliland.

24 guuradeedii ayaynu u dabbaaldegaynaa. 18-ka May cir-ka-soo-dhac suke ah oo kelideed meel taagan ma aha. Isirro taariikheed iyo abtirsi awoowayaal hore leh ayaa sinjiga iyo sawraca jiritaankeedu ka soo jeedaa.Waa sooyaal xidhiidh fog la leh oo shafka ku haya jiritaanka ummadda Somaliland ku dhaqan min bariga shishe gobolka Sanaag (Ceelaayo) iyo galbeedka Awdal iyo Salal (Lawyocado), iyo inta ka dhax leh.

Dhowaan uun bay ahayd kolkii la daahfuray godad-taariikheedka Laasgeel (Hargeysa iyo Berbera u dhaxaysa). Khuburada degel-baadhku, waxa ay 2002-dii ka tibaax bixiyeen waxyaalaha fanka iyo farshaxanka ah ee dhagxaanta sula' la qoray ka soo jeeda ee Laasgeel laga helay uu tirsi-taariikheedkeedu ku eeg yahay 8,000 – 10,000 sannadood. Tagtadaas guunka ah ayay 18-ka May afka saaraysaa oo minjaheedu ka soo jeedaan.

Dadkeennu xoolo-raacato ayuu ahaa la guurguura gedgeddoonka cilmilada iyo waayaha nololeed kufaa-kacyadiisa. Dhaqankeenna hadlaaga oday-ka-sheekeega ahi, waxa uu isku raacsan yahay in xagga badda iyo Maakhir Coast-ta gobolka Sanaag laga soo degel kacay sannado hore oo oogada sare loo soo hayaamayey, taas oo raadadkeedu weli sii muuqdaan.

Aragtiyo kale oo ajanebi badani isla oggol yihiin na waxa ay hoosta ka xarriiqayaan in dadka Soomaalidu iyaga oo ka mid isirka Reer Xaam, Nebi Nuuxna ku abtirsadaa ay ka soo hayaameen buuralayda Kawkaasiya ee waqooyiga Iiraan iyo Mesobataamiyada Ciraaq gu'yaal aad fog.

Baadhitaannada taariikheed ee laga soo dheegtay waxyaalaha ubucda dhulka laga qodaa, waxa ay muujinayaan in xeebaha dhulkeenna la degganaa oo ooshu fadhiday ilaa xilliyadii bilowga ahaa ee taariikhda aadanaha inta la hayo.Waxa kale oo la hayaa raadad iyo muuqaallo kale oo ka soo jeeda casrigii Dhagaxa.

Raadadka ugu faca weyn ee la hayaa waxa ay ka soo maaxayaan ilo-taariikheedka dunida ugu da'da weyn ee Faraaciintii Masaarida. Xeebaha waqooyi iyo bariga badda cas ayay Faraaciintu la lahaayeen ganacsi ku taxmaya waxyaalaha udugga ah ee fooxa iyo beeyadu ka midka yihiin. Waxaana geyigaas ay ugu yeedhi jireen "*Dhulkii Udugga"* ama *"Ilaahyada*" ama "*Awoowayaasha"* iwm.

Finniiqiyiintii Reer Shaam, Yuhuuddii Bariga Dhexe iyo Hunuudda, ayaa xilliyo dambe xidhiidh baayacalmushteri iyana Soomaalida la yeeshay. Ilbaxnimooyinkii Giriigga iyo Roomaanka, ayaa laftoodu degaannadeenna ku soo dacal-dhebayey laga soo bilaabo xilligii Alaxender.Waxa dhigaallo ammuurtaas ka hadlaya laga heli karaa Tusihii Gacan-qabsiga Badda Eritrea oo la qoray sannadkii 40-kii, Buuggaasi waxa uu dadka xeebahaas ku nool ugu yeedhayaa Berberi.

Xilliyadii dhexe iyo soo ifbixii diinta Islaamka iyo fiditaankeedii ayaa raadad badan laga hayaa.Culimadii Carbeed ee diinta fidinaysay, ayaa maamulladii ugu horreeyey ka yagleelay magaalooyinka xeebaha ku yaalla Saylac (Awdal), Berbera (Saaxil) iyo Bullaxaar.Ilaa qarnigii 15aad, suldaanno Carbeed ama suldaanno Carabta ku xidhan, ayaa arlada ka talinayey.

Qarnigii 16aad, Boortaqiiska oo Boqortooyadii Abasiiniya foodsaaro ka dhiganaya ayaa gobolka Geeska Afrika soo galay, jebiyeyna kacdoonkii Islaamiga ahaa ee Axmed Ibraahim Alqaasimi (Axmed Gurey).

Qarnigii 17aad, waxa ay Soomaalidu taageero ballaadhan ka heshay boqortooyadii Cismaaniyiinta ee Turkiya, ilaa iyo qarnigii 19aad ayaanay Cusmaaniyiinta geyigeenna dusha ka ilaalin jireen, tiiyoo Masaaridu wakiil uga ahayd. Raadadka ay Turkigu waddankeenna kaga tageen waxa ka mid ah Biyaha Dubaareed ee Berbera.

Dubaar waa erey Afka Turkiga ka soo jeeda oo la macne ah Derbi.Masaajiddo uu ka mid yahay masjid Jaamaca Berbera ayaa muuqaallada kale ka mid ah.

1869 waxa la furay *kinaalka Suways*, taas oo sii dhiirrigelisay damacii gumaystayaasha reer Yurub iyo kacaankoodii wershadaha ee xilliyadaas dunida ka calanwallaynayey. 1839 waxaay ku beegnayd qabsashadii Cadmeed ee Ingriiska, taas oo iyana ahmiyad xeel-qorsheed ama istraatiijiyadeed siisay xeebaheenna oo noqday marin isku xidhaya Mustacmaradaha Ingiriis ee Yemen iyo Hindiya, iyo dhinaca kale irrid Afrika laga galo.

1854 waxa booqashooyin iyo sahan dhulkeenna ku yimi *Sir Richard Burton* oo ilaa Herer ku sinmay.Kulamo badan buu Ingiriisku la yeeshay salaadiintii Somaliland.Aakhirkiina waxa dhex martay mucaahadadii caanka ahayd ee saanta lagu kala saxeexday. Waxyaalaha lagu heshiiyey na waxa ka mid ahaa:

- *In Ingiriisku ilaalin doono dhulka Somaliland*
- *Inuu suuq geynayo oo ka iibsanayo hilibka iyo xoolaha nool ba*
- *In aanu faro gelin doonin arrimaha gudaha, sida diinta, dhaqanka iwm*
- *In aanay haweenkiisu geyigeenna ku ummuli karin, qofka ka geeriyoodana aan lagu xabaali Karin*
- *In uu ka guuri doono xilliga ay ka codsadaan.*

Waxa xusid mudan in Ingiriisku ka baxay heshiiskaas muddo yar ka dib, isaga oo jebiyey qodobkiisa koowaad.1897 ayuu si hoose u bixiyay qaybo ka mid ah dhulkii lagu la heshiiyay inuu ilaaliyo. Feb 1954-kii na, waxa dhulka *Hawd iyo Researve Area* si rasmi ah ugu wareejiyay Boqor *Xayle Salaasihii* Itoobiya. 5-tii Feb 1955, waxa booqasho garnaqsi ah oo arrintaas ku saabsan London ku tegey wefti ay hoggaaminayeen laba suldaan oo kala ahaa:

Suldaan Cabdillaahi Suldaan Diiriye, Suldaan Cabdiraxmaan iyo labada siyaasi oo kala ahaa: Maykal Maryaano iyo Cabdiraxmaan Cali Maxamed (Dubbe Cali-yare).

Waxa xubnaha weftigaas Ingriiska culays ku saarayeen in Hawd la soo celiyo iyo in gobannimo la siiyo.Gobannimo keliyaa se loogu ballanqaaday.

Inkasta oo heshiiskaas cuqaasha iyo Ingiriiska dhexmaray xeeldheeraani ka muuqatay waagaas, haddana waxa uu noqday mid wada qancin waaya dadkii xilligaas noolaa.

"Berberi Wax Go' Lagu Qaado Ka Weyn" ayay jawaabtii shacbigu noqotay.

Faarax Nuur oo ka mid ahaa afhayeenkii dareenka shacbiga ayaa dharaartaas lahaa:

-Waa duni la kala iibsadoon nala -ogaysiine
-Waa duni akhyaartii luntoo aaran soo hadhaye
-Orgigaa riyaha taabaxoo oodda faaliga'e
-Waa duni hablii la arki jirey aqalka diideene
-Aan se ila ah aakhiro sebaan iligyadiisiiye
'Nimanyahaw Isaaq xaajadaa la la aguugaayo
-Odayaasha loo geynayee la anfacsiinaayo
-Haddaad niman Islaamiya tihiin Aadan Faraciisa
-Oo aydaan Ilaahay ka go'in ha ina oodina'e
-Asaxaabihii bayna yidhi gaal ha aaminine
-Hadduu awrka dooxada ku furo eel kalaa xigiye
-Waar inaga daaya yaynaan ku dhicin bahal afkiisiiye!!

1887 (128 sannadood hadda) ayaa Ingiriisku gacanta ku dhigay Somaliland, kana sameeyey mustacmarad uu danahiisa ku ilaashado.

-"Dagaalkii Nasaarada anaa daalib ku ahaaye
-Daliilkii Rasuulkii anaa doonayoo helaye
-Anaa diiday gaal daacufle ah daba galkiisiiye
-Dalka ma lihid anigaa ku idhi doora-weynaha'e
-Anaa diidey maantuu lahaa deeqdan iga hooey
-Diintayda anigaan ku gadan dabaqi naareede
-Anaa labada daarood tan hore derejo moodayne"!
(Seyid Maxamed Cabdille Xasan)

Ingiriiska kolkiiba waxa ku kacay dad badan.*Seyid Maxamed Cabdille Xasan*, ayaa abaabulay kacdoonkii ugu horreeyey, ugu na weynaa ee Somaliland ka hanaqaada, kuna fida dhulalkii kale ee Soomaalida.

1899 – 1921, ayuu Seyidku siyaalo kala duwan guluf weyn iyo dagaallo yaab leh Ingiriiska galaabixiyey. Ciidankii Daraawiishta oo noqday ciidankii ugu horreeyay ee dayaarado gumaysigu kula dagaallamo Afrika, ayuu Seyid Maxamed gabay iyo xoog hubaysan ku dagaal geliyey muddo ka badan 20 sannadood. Taageeradii uu u baahnaa ayuu ka waayey shacadka intiisa badan, ka dib saluug badan oo salka ku hayey sidii uu Seyidku wax u maamuli jirey, deedna isaga oo aan hadafkiisii gaadhin baa la jebiyay.

-*"Coomaaddayaal duulayay Cadan ka keeneene*
-Cirka iyo dhulkii bays qabsaday cadhadhaqdoodiiye
-Adigu ba caqlaad leedahaye carar maxaa dhaama"?!
(Seyid Maxamed Cabdille Xasan)

1921 ayuu Seyid cudurka duumada ee kaneecadu keento ugu geeriyoodey *Iimay* ku taalla daanta galbeed ee shishe qawyada uu maro *webiga Shabeelle* ee dhulka Soomaalida ee Itoobiya haatan hoos taga. Isma uu taagin kacdoonkii Ingiriiska ka dhanka ahaa, waxaana shidantay oog-dhamaceeddii halgankii xornimo-doon ee siyaasiga ahaa.

Xaaji Faarax Oomaar Ileeye ayaa dhammaadkii 1910-nadii bilaabay abaabul dhaqdhaqaaq siyaasi ah oo hoosta ka xarriiqayey xaqa dadkiisu u leeyahay in uu aayihiisa ka tashado. Gulufka Daraawiishta iyo halganka siyaasiga ah ee Faarax Oomaar way is gaadheen, hase yeeshee Faarax qalinka iyo qawl ku-dagaallan ayuu ahaa, halka uu Seyid Maxamed Cabdille Xasan seef iyo qori ku gayllan ka ahaa.

-*"Hayaay na cunyeey, naga soo gaadhaay"! iyo*
-*"Dadkaygu wuu ka itaal yar yahay in la rarto*
*Dalkayguna wuu ka yar yahay in la kala qaybiyo"!*Ayaa ka mid ahaa hal-ku-dhegyadiisa siyaasadeed.

Xaaji Aadan Axmed Xasan (Afqallooc):
-"Da'dii uu ahaa Faarax baa jeelka loo diray
-Loo diid durriyadduu dhaliyo duunyaduu dhaqaye
-Haddeeruu sidii dawri aar dibedda meeraayee"!

Xaaji Faarax waxa uu ahaa ninkii indhaha u jeexay ee laangooyada u sameeyey waddada dawladnimada casriga ah ee Somaliland ee aynu maanta jidkeeda haynno. Isaga ayaa ka dambeeyey oo lahaa yagleelkii khayriyadaha magaalooyinka Burco, Hargeysa iyo Berbera oo noqday halkii ugu horraysay dareenka wadareed ee halganka xornimo baafintu ka bilaabmay.

Xaaji Faarax Oomaar Jeel iyo masaafuris ayuu noloshiisa ku dhammaystay.Xilliyadii dagaalkii labaad ee dunidu sii dhammaanayey, ayaa ***Sheekh Bashiir Yuusuf*** ka kacay magaalada Burco. Sheekh Bashiir, waxa uu ku dhashay xero Daraawiisheed oo aabbihii ***Yuusuf Fiqi Xasan*** ayaa ka mid ahaan jirey hormoodkii Daraawiishta. Sidaas awgeed, dagaal ka-fool-ka-fool ah, ayuu ku dhawaaqay in Ingiriiska lala galo.Culimadii Burco ayuu shiriyey, kuna boorriyay in ay halgan u diyaargaroobaan.

Culimadii baaqa sheekha way ka warwareegeen, waxanay u sheegeen in ay Alle ka baryi oo quraanka akhriyi si gumaysigu uga kaco. Xigmad culus iyo halhays buu Sheekh Bashiir ka tegey:

Bilaale ayuu soo qaaday oo culimadii dhex dhigay oo ku yidhi *"ku akhriya 30-ka jis ee qura'aanka oo bilaalahaas ku jebiya"*! kolkii ay cabbaar ku akhriyeen, ayuu bakooraddiisii inta uu qaaday yidhi *" Bismillaah"* oo dhalfiifaha kaga dhigay oo bilaalihii laba ugu kala jebiyey, waxaanu yidhi ka dib *"Wadaadow ficilka iyo bisinku way wada socdaan"!!*

Xaaji Aadan Axmed Xasan (Afqallooc):
-"Duhur baa Bashiir la shannaqay daar agtiinna ahe
-Dahriga iyo laabtay raasaas kaga daloosheene
-Damal la hadh gala bay jabsheen waqaay dulloobaane"!

Sheekh Bashiir dagaal carcaro qaba ayuu Burco Ingiriiska kula galay, ugu dambayna waa lagaga xoog roonaaday, waxaanu galay *Buur-dhaab* oo lagu dilay isaga oo gaylan diriraaya.

Qaybta 2-aad:

"Khatar ha gelinnina aayatiinka mustaqbal ee dadka iyo dalka Somaliland"!

Sidaas waxa ku dardaarmay ***Sir Douglas Hall*** oo ahaa badhasaabkii Ingiriiska ee Somaliland xukumayey, isaga oo 6-dii April 1960 la hadlayey xubnihii *33-ka ahaa ee golihii wakiillada* iyo xubnihii *golaha wasiirrada ee 4-ta* ahaa oo shirkoodii ugu horreeyey kaga wada dooday gaadhidda gobannimada iyo midnimo degdeg ah oo Somaliland iyo Soomaaliya wada galaan. Sir Douglas Hall iyo xoghayihii guud ***Phillip Carrel*** labadu ba waxa ay kula talinayeen xildhibaannada khatarta ka dhalan karaysay midnimo degdeg ah oo jibbo iyo caaddifadi keenada u hayaan.Qormadan dhexdiisa kaga sii bogo arrimahaas iyo qaar kale oo la xidhiidha.

Dhammaadkii dagaalkii labaad baraarug weyn ayay dadyowgii la gumaysanayay, gaar ahaan kuwii Afrikaanku, la hanqal-tooseen. Yaboohintii xornimada ayaa na cirka isku shareertay oo loo qalab iyo qaylo-dhaan dirtay.

Aasaaskii iyo hanaqaadkii axsaabtii siyaasiga ahayd ee xornimodoonka ayaa aabbudhka furatay:

Dhammaadkii dagaalka waxa lagu dhawaaqay *SNL* oo hore na u ahayd *SNC* (1935). SNL waa xisbigii ugu horreeyey ee siyaasi ah ee la yagleelo marka laga reebo ururradii Somali Islamic Association (Cadan, kuwii shaqaalaha (Somaliland) iyo Ururkii Isxaaqiya (Sawaaxil) oo wuxu ba xidhiidh toos ah inta badan iyo mid dadban lahaa halgankii siyaasiga ahaa ee Xaaji Faarax Oomaar Ileeye oo lahaa yagleelka labada hore.

SNL waxana hormuudkeeda ka mid ahaa:

1. Sheikh Cumar Askar
2. Maxamed X. Ibraahim Cigaal
3. Yuusuf Ismaaciil Samatar (Gaandi)
4. Axmed Kayse Cabdalle
5. Yuusuf X. Aadan Qabille
6. Xaaji Xasan Geelle

7. Yuusuf Iimaan

8. Cabdiraxmaan Cali (Dubbe Cali Yare)

9. Maxamed Cali Faarax

10.Sheekh Cali Ismaaciil

11. Naasir Naxar

12. X. Ibraahim Cismaan Food (Basbaas)

USP ayaa isna lagu dhawaaqay wax yar gobannimada ka hor, waxaa na hormuudkiisa ka mid ahaa:

1. X. Ibraahim Nuur iyo

2. Cali Garaad Jaamac

NUF, oo hore u ahaa isir loo xilsaaray soo dhicinta Hawd iyo Researve Area, Ingiriiska na arrintaas culays ku saarayey, ayaa isna wax yar ka hor gobannimada xisbi u dhalan doorsoomay, waxana horseedkiisa ka mid ahaa:

1. Micheal Mariano

2. Axmed Xasan

Halgankaasi waxa uu lahaa Jaraa'id iyo caroogyo hal-abuur oo aan idaacadda iyo tv-yada ka dhicin. Jaraa'idka waxa ka mid ahaa***:***

Qarnal Ifriiqiya, Alsoomaali, Al-liwaaya, Akhbaarsida !

Maxamuud Jaamac Uurdoox *iyo* ***Muuse Ismaaciil Galaal*** ayaa ka mid ahaa warfidiyeenkii ugu firfircoonaa, una horreeyey.*"Hayaay bal eega, Hasheenna naaxday Libaaxu haysto"* *iyo"Hangool nin sitoo, Hashiisa irmaan, Ha maalin la leeyahaan ahay!"*Ayaa ka mid ahaa sarbeebta lagu gayllan dirirayey!

Maxamed Ismaaciil Maxamuud (Basarce/Barkhadcas) ayaynu ka soo qaadan karnaa hal-abuurkii ugu codka dheeraa ee dhiirranaa halgankaas dhinaca maansada waddaniga iyo xornimo-doonka ah. Afafka Carabida iyo Ingiriisida, ayuu Barkhadcas si wanaagsan u yiqiin oo waxa uu ahaa reer Cadmeed adduunka wax kala socday.

Waxa uu soo akhriyi jiray jaraa'idkaas oo labadaas af kusoo kala bixi jiray. Inta uu Faras magaalaha Hargeysa yimaaddo, ayuu dadka Afsoomaali ugu turjumi jiray:

– "Alsoomaal, Al-liwaa iyo Akhbaarsida
– waxaan ahay tii afraynaysoo
– Iyadu iibso iyo adduun ma gashoo
– afkeedana way ku hadashaa"!

Feb 1954 Hawd and Reserve Area maalintii la bixiyay na waa kii lahaa:

– "Dhallintii waddankiyo dhulkaannu nahoo
– Inaannu dhimanniyo inaannu dhacsanno
– Maantaan waxba nooga dhaxaynayneey"!!

1959 Waxa Hargeysa booqasho ku yimi *Diyuuk of Edenbrough*. Aan soo dhowayno, ayaa dadkii yidhi Barkhadcas waxaka mid ahaa walaalkii *Aadan Ismaaciil*, waxaanu ku hal-celiyay:

– "Isagoo Iglan jooga buu I diloo
– Ushuu soo fidshaa I iimaysoo
– Waanigaa aramidiisi aahda hayee
– Ninkii awoowgay Indhaa tiray
– Ninkii aabbahay addoonsaday
– Ninkii anigana i iibsaday
– Haddaan ogohoonan ka aarsan karayn
– Haddaanan Aadanow unuunka jarayn
– Ninkaas araggiisa uurkaan ka ogee
– Aan ooyo'e albaabka ii xidha"!

1959 waxa London loo diray weftigii xornimada qaadashadeeda in ay soo go'aamiyaan loo xilsaaray, waxa na ka mid ahaa xubnihiisa:

• *Maxamed X. Ibraahim Cigaal*
• *Cali Garaad Jaamac*
• *Axmed-kayse Caabdalle*
• *X. Ibraahim Nuur*

Markii la soo gaadhay in Ingiriisku gobannimo siinayo Somaliland, waxa saddexdii xisbi ee dalka ka jirey galeen doorasho Feb 1960.Waxa aqlabiyadda ugu weyn helay SNL oo *Maxamed X. Ibraahim Cigaal* hoggaaminayey, labada xisbi ee kalena waxa kala hoggaaminayey NUF oo *Micheal Mariano* hagayey iyo *Cali Garaad Jaamac* oo USP madax u ahaa.

Saddexdaas xisbi iyo madaxdoodu way wada aqoonsanaayeen in Soomaalida hagoogta seere dawladeed la wada hoos keeno oo hayb siyaasadeed iyo hab-raac maamul oo keliya yeeshaan. Hase yeeshee waxa ay ku kala duwanaayeen qaabka iyo goorta midnimadaasi ay ugu habboon tahay ee ay iman karto midnimo dhidibbo adag ku taagan, weliba dhinacii Talyaanigu gumaysanayey oo markaas ku jirey xaalad kala guur ahayd oo loogu gogol xaadhayey gobannimo gaadhsiintii 10-ka sannadood ahayd.

Michael Mariano hoggaamiyihii N.U.F ayaa qolyaha kale aad uga mawqif duwanaa marka la eego midnimada iyo goorteeda ugu habboon.Waxa uu Micheal ololaha doorashada ku galay in Ingiriisku waddanka sii joogi doono muddo 10 sannadood ah oo intaa laga baran doonno habka maamulka iyo hannaanka dawladnimo.Tobankaas sannadood Somaliland in ay maamul hoosaad yeelato si u dhiganta sida Soomaalidii Talyaaniga, ayuu Micheal aqoonsanaa.

Waxa kale oo Micheal soo jeediyey in marka tobankaas sannadood dhammaadaan inagga oo wax ka garanayna hab-raaca maamul iyo dawladnimada in aynu markaas Soomaalida (Muqdisho) la midowno. 1970 ayuu Micheal hilaadinayey in la midoobo.

Waxa kale oo Micheal soo bandhigay fikir hoosta ka xarriiqayey in tobankaas sannadood ee Ingiriis ina tababarayo in aynu u dagaallano si diblomaasi ah in dhulka Hawd iyo Reserve Area

oo weli Ingiriisku maamulkiisa lug ku sii lahaa in aynu cadaadis ku saaro sidii uu Ingiriisku dib ugu ku soo celin lahaa gacanta Somaliland.

Runtii Micheal madaxda xisbiyada kale waxa uu kaga duwanaa waxa uu ka soo shaqeeyay isaga oo mas'uul sare ah Kenya, Somaliland, Muqdisho iyo Jigjiga oo Hawd iyo Reserve Area laga xukumi jiray. Sida la og yahay na xilligii uu socday iyo dhammaadkii dagaalkii 2aad ee dunida, markii Faashigii Talyaaniga la jebiyey, Ingriisku waxa uu gacanta ku dhigay dhammaan dhulalkaas Soomaalida oo dhan marka laga reebo Djibuuti oo Faransiiska oo ay Ingiriiska xulafo ahaayeen gacanta ugu jirtey.

Markii dagaalku dhammaadayna Muqdisho iyo Leegada (SYL) garabkeedii Talyaani raaca ahaa, ayaa doortay in Rome dib loo hoos geeyo markii UN-tu masiirka xoogaggii la jebiyey dadyowgii ku hoos noolaa la kala dooran siinayey in ay hoos joogaan xooggii guulaystay dagaalka ee qabsaday ama dib ugu noqdaan quwaddii la jebiyey ee ay dagaalka ka hor hoos tegayeen ee gumaysanayey. 1950 ayay Muqdisho dib Rome loogu celiyey halka NFD, Somaliland iyo Hawd and Reserve Area weli gacantii London ku hadheen, Djibuutina Paris.

Micheal waxa uu ahaa siyaasi ka aragti fogaa inta badan raggii ay siyaasadda ku wada jireen, waxa aanu ogaa xaqiiqada ka jirta afarta qaybood ee Soomaalida ee uu ka soo shaqeeyey iyo in aanay diyaar ka ahayn oo looga wada bislayn garaad ahaan midnimo lagu degdegaa. Loo ma se garaabin oo loo ma joojin, ummaddiina way ka hor timi oo ka firdhatay, waana tii loogu heesayey ayaamihii doorashada loollankeedu cirkaa marayey ee lagu lahaa:

– "Maska daba socdiyo
– Maykal iska eeg"! Iyo

– "Nimaanan ujeeddadiis garan, Udgoona ba yidhi
– Indhaha ka qarshee, maxaan Aadanow ku aamini?!"

Malahayga xagga qabitaankiisa diimeed na door weyn bay ku lahayd diidmadaas laga la hor yimi.

Cali Gaarad Jaamac oo xisbiga USP hoggaaminayey ayaa ugu soo aragti dhowaa Micheal marka la eego dareenkiisa midnimo degdeg ah oo Hargeysa iyo Muqdisho wada galaan. Cali Garaad Jaamac waxa uu soo jeediyey in ay Somaliland xorriyaddeeda lix bilood haysato oo aanay ku degdegin in Soomaaliya lagu darsado, kacdoon baa isna ka hor yimi ku dhawaaqaya:

– "Laa, Laa, Laa, Yaa Garaad!"

Labadan xisbi ee USP iyo NUF waxa doorashadii kaga adkaaday SNL oo u ololaynaysay midnimo aanu gabbalku ka dhicin oo Hargeysa iyo Muqdisho shuraad la'aan ku wada galaan, taas baana loogu footeeyey si aqlabiyad ah doorashadii Feb 1960.

Xafiiska lagu kaydiyo xogta iyo qoraallada taariikhda ee ku yaalla magaalada London ee loo yaqaan *"Public Records Office*" ayaa sannad kasta waxa lagu soo bandhigaa qoraalladii sirta ahaa ee la kaydiyey ee ka qarsoonaa ama dednaa indhaha bulshada muddo 30 sannadood ah.

Bisha January ee sannad kasta waxa xafiiskaasi u tartama aqoonyahannada taariikhda raadraaca iyo weriyayaasha warbaahinta si ay u milicsadaan sirta cusub ee la soo bandhigay.Bishii January ee sannadkii 1991 ayaa haddaba la soo bandhigay sirihii 30-ka sannadood huursanaa ee qarsoonaa.Waxa siraha sannadkaas la soo bandhigay ka mid ahaa galalkii ay ku jireen dhacdooyinkii siyaasadeed ee muhiimka ahaa ee Somaliland ka ilmo-roganayey sannadkii 1960.Saddex gal qoraallo ka kooban ayaa xogtii la soo bandhigay ka mid ahaa. Waxa galalkaas lagu suntay magaca ***"Union of Somaliland and Somalia"*** oo aynu af Soomaali ugu turjumi karno ***"Midowgii Somaliland iyo Soomaaliya"***

Waxa kale oo sirtaasi la soo bandhigay ka mid ahaa kayd-galeed weyn oo lagu magacaabay ***"Minutes of Legistative Council of 1960"***, kaas oo ku saabsanaa daqiiqadihii la qaaday iyo wixii ay xildhibaannadu kaga wada hadleen fadhigoodii Golihii Sharci-dejinta Somaliland ee 1960.

Waxa qoraalladu ka tibaax bixinayaan in mudanayaashii Golahaas Sharci-dejinta ee la soo doortay 17/02/1960 ay kulankoodii ugu horreeyey yeeshen 05/04/1960.Waxa shirkoodu ku qabsoomay halka hadeerto loo yaqaan *Goodirka* ee badhtamaha Hargeysa.

Waxa kulanka ka qayb galay xildhibaannadii ku guulaystey doorashadii Febraury 1960 ee ka kala socday saddexdii xisbi ee tartanku dhex maray ee SNL, USP iyo NUF.Waxa kale oo goob-joog ka ahaa badhasaabkii Ingiriiska ee Somaliland xukumi jirey ***Sir Douglas Hall*** iyo Xoghayihii Guud ee ***Phillip Carrel***.

Xildhibaannadii shirkaas ku wada doodayey oo ay ku jiraan golihii wasiirrada ee cusbaa, waxa uu uu qoraalku hoosta ka xarriiqay, in ay isku wada raacsanaayeen in arrinta madaxbannaanida Somaliland iyo midnimada Soomaalidu ay tahay qodob isku sidkan oo aan laba laga dhigi karin, loogana doodo sidii hal qodob oo keliya. Waxa ay xildhibaannada ula muuqatay in labada la isla helo mar qudha ama la wada waayo.

Waxaase xiiso badan leh in qoraalku muujinayo in xubnihii Ingiriiska ahaa ee kulanka fadhiyey uga dareen bixiyeen xildhibaannada khatarta ay yeelan karaysay midnimo degdeg ahi. Waxa ay u arkayeen oo kale in midnimadaasi degdegga ahi ay sii fogayn karto dhulka Hawd and Reserve Area oo markaas carcaraha dooddeedu taagnayd, dawladda Ingiriisna ay weli ilaalin jirtey xuquuqda dadka dhulkaas ka soo jeeda oo ay kharash badan ku bixin jirtey.

Phillip Carrel, Xoghayihii guud, oo la hadlayey xildhibaannadii Somaliland, ayaa isku barkiyey oo isa saaray midnimada degdegga ah iyo dhulka Hawd and Reserve Area, waxaana ereyadiisii ka mid ahaa *"tuhun iyo shaki igagama jiraan in dadka Somaliland ku nooli doonayaan in ay Soomaaliya la midoobaan, waxa aanan hubaa in dawladda Ingiriiskuna himiladaas ku taageeri doonto"*.

Hase yeeshee, buu yidhi *Phillip Carrel*, "*Bishii u dambaysay ayay dadka gashay qiiro iyo jibbo weyn oo ay ku doonayaan in ay la midoobaan Soomaaliya 1-da Julay oo ah isla maalinta dalkaasi xornimadiisa qaadanayo. Ilaa iyo haddana wax wada hadal ah oo arrintaasi ku saabsan oo labada dal (Somaliland iyo Soomaaliya) ka wada yeesheen ma jirto*".

"*Waxana jira arrimo badan oo u baahan in laga wada hadlo inta aan la midoobin ka hor. Ugu horreyn waa in labada dal ku heshiiyaan distoor ka wada dhexeeya.Si loo ilaaliyo xuquuqda iyo danaha dadka heshiiska wada gelaya oo idil waa in arrintani laga gaadhaa heshiis ka hor inta aan la is-raacin*", ayuu Phillip xildhibaannada ugu nuuxnuuxsaday.

Sidoo kale waa in laga heshiiyaa ayuu yidhi *"sharciyada doorashada, qaabka dawladdu noqonayso, afka rasmiga ah, habka cashuuraha loo qaado, lacagta la isticmaalayo, mushaharka shaqaalaha dawladda iwm*".Waxaasi oo idili waxa ay u baahan yihiin ayuu tilmaamay in dad khubaro ah loo xilsaaro, si ay u daraaseeyaan, ugana soo talo bixiyaan, si dawladda midnimadaasi ka dhalataa u noqoto mid ku taagan dhidibbo adag.

Phillip Carrel oo sii wata hadalkiisa ayaa waxa uu intaas raaciyey oo yidhi *"arrinta ugu daran ee u baahan in laga tashadaa waxa ay tahay arrinta Hawd and Reserve Area, maalinta aad xornimada qaadataan ee ay midnimadaasina dhacdo waxa dhammaanaya xilkii Ingiriiska ka saarnaa Maxmiyadda Somaliland. Haatanna dawladda Ingiriiska ayaa bixisa Kharashka ku baxaya Hawd and Reserve Area.Haddii aan heshiis cusub laga gaadhin hawlaha halkaasi ka socda oo dhan ayaa joogsanaya.Taasoo ah in heshiiskii Itoobiya lala galay 1954 uu noqonayo mid dhammaaday".*

"Inkastoo heshiiskaasi aan ogahay, buu yidhi, in aydaan jeclayn, haddana dadka reer Somaliland ayuu u suurtogeliyey maamul xuquuqdooda ilaaliyaa in uu halkaasi joogo marka ay u tallaabaan dhinaca Hawdka".Ayuu yidhi Phillip Carrel.

"*Haddii aan heshiis cusub la la gelin Itoobiya waxa meesha ka baxaya, buu yidhi, maamulkii ilaalinayay xuquuqda dadkaasi.Ilaalada halkaasi joogta oo idil ayaa loo soo rari doonaa dhinaca Somaliland, mana jiri doonto cid kala ilaalisa beelaha diriri ka dhex aloosmi karto.Mana helayaan taageero waxbarasho iyo mid caafimaad toona"* ayuu hadalkiis ku soo ururiyey Phillip Carrel.

Dhinaca kale waxa isna halkaas xildhibaannada kula dardaarmay oo kala hadlay 6/04/1960 *Douglas Hall* oo ahaa badhasaabkii Ingiriiska ee Somaliland ka talinayey xilligaas. Waxa uu isna yidhi :

"*Anigu dawladda Ingiriiska ayaan u gudbinayaa sida dadka Somaliland ku nooli u doonayaan madaxbannaani iyo midnimo, hase yeeshee waxa idin saaran xil weyn oo ah in aad ka soo baxdaan waajibka ay idinku leeyihiin dadkii idin soo doortay, si aad uga ilaalisaan dhibaato ay ku keeni karto midnimo aan loo gogol xaadhin oo aan loo dhammaystirin hawlihii lagama maarmaanka u ahaa, si iska fudud iyo degdegna lagu galay*"!

Sir Douglas Hall, waxa uu hadalkiisii ku soo gabagabeeyey gunaanadkan dardaaranka ahaa: *"Khatar ha gelinnina aayatiinka mustaqbal ee dadka iyo dalka Somaliland"*!

Hadalladaas ay *Phillip Carrel* iyo *Sir Douglas Hall* u naqayeen xildhibaannadii Somaliland maalintaas waxa uu inta badan ugu muuqday hadal hawadu sidato oo aan macne badan ku fadhiyin, maalmo yar ka dib se macne badan ayuu dad badan u samayn lahaa haddii ba ay cidi xasuusan lahayd, maantadan qoyan buu se weligii ugu macne samayn badan yahay marka si fiican looga bogto, loona gorfeeyo ee lagu dhereriyo geeddi-socodka galaha taariikheed iyo wacaalaha xaaladihii la soo maray iyo wixii laga mutay midnimadaas iyo joogtada maantadaa qoyan xaqiiqooyinka jira ee faraqa inoo sudhan.

Siciid Cali Baando ayaan u mahadnaqayaa oo markii ugu horraysay, dhawr sano ka hor, xogtan galalka *"Union of Spmaliland and Somalia 1960"* ee "*Public Records Office*" ila soo wadaagay.

Si kastaba ha ahaato'e, 26-kii June 1960 Beerta Xorriyadda ee u dhaxaysa Togga Maroodijeex iyo Codkii Goodirka, Hargeysa, Hooyadii Xorriyadda Soomaalida, ayaa calan saarkii ka dhacay.

Cabdillaahi Suldaan Maxamed (Timacadde) ayaa la oogsanaya:

– "In sidayda tihiin iyo
– In kalaanan saxayne
– Soomaaloo calan taagta
– Saakaynoogu horrayso'e
– Saaxirkii kala guurnaye
– Sarreeyow ma nusqaamow
– Aan siduu yahay eego'e
– Kaana siib kanna saar"!

– "Waataa curatayoo mataano dhashee
– Aan maallo hasheenna Maandeeqeey"

– Golatoo candhadii gollaha marisee
– Aan maallo hasheenna Maaqdeeq" iyo

– "Soomaalaay kulligaa
– Kulmiyaa la sudhee
*– Kadabaa dhaha eey"****!***

Kooxdii Walaalaha Hargeysa oo ay ka dhex muuqdaan cododkii qayuuriga ahaa ee *Maxamed Axmed Kuluc* iyo *Maxamed Yuusuf Cabdi*, labada (AHUN), ayaa iyaguna maalintaas qaadayay.

Xornimadii Somaliland waxa ay heshay aqoonsi caalami ah oo ay qalinka ku duugeen in ka badan 34 dawladood oo ka tirsan waddamada Qaramada Midoobey.Waxa xusid mudan in ay waddamada Somaliland aqoonsaday xilligaas ay ka mid ahaayeen dhammaan waddamada awoodda badan ee USA, UK, France, China iyo Germany. Bal se 5 maalmood ka dib ayay Somaliland si shuruud la'aan ah ula midawday Soomaaliya oo 6 maalmood ka dib qaadatay xormadiisii.

Jaraa'idkii caalamka ka soo baxay, gaar ahaan Ingiriiska, waxa 26-kii Juun 1960 uu bogagga hore ku wadheen faallooyin aan faraxadi ka muuqan oo ay ka mid ahaayeen *"Dadkii dawladnimadooda tuuray ama diiday iwm!"*

Si kastaba ha ahaato'e, himilada halgankaasi waxa ay ahayd sii ambaqaadka riyadii Soomaaliweyn.In la xoreeyo oo deedna la isu keeno shanta Soomaaliyeed.Soomaalidii Talyaanigu gumaysanayey, Djabuuti oo Faransiisku haystey, Somaliland, NFD iyo Soomaalida Itoobiya.

1-dii Julay 1960, waxa xoroobey Soomaalidii Talyaaniga, isla maalintaana waxa is-raacay Somaliland iyo Soomaalidii Talyaaniga si shuruud la'aan ah oo degdeg ah, waxana daba ka riixayey midowgaas Somaliland oo naanaysta "***Qaldaan"*** dadkeedu kula baxeen.

Gobannimada gaadhiddeeda natiijooyinkii tabnaa ee ka soo baxay, hal-abuurka ayaa dad hortii dareenkoodu ku cabbiray.

Waxaana hal-abuurkaas ka mid ahaa:

Axmed Ismaaciil Diiriye (Qaasim):

– "Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye
– Dusha midabka Soomaali baad dugulka mooddaaye
– Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii Karele!"

Aadan Axmed Yuusuf (Aadan-carab):

– "Sidii baan midhaa uga gurtaa madaxa Toomoode
– Sidii baan martida caanogeel ugu macsuumaaye
– Sidii baan marqaafyo u sitaa maas la ii tolaye
– Bal muxuu maslaxadoo itaray ministerkaan doortay!"

Qaybta 3-aad:

Wax yar ka dib gaadhitaankii gobannimada iyo is-raacii labada gobol sidaas aynu soo tibaaxnay, iyada oo weli lagu guda jiro *"Bishii Malabka ama Shahral Casalkii ama Honey Moon-kii arooska)"* ayaa maansayahankii gobannimada halgankeeda ka mid ahaa ama dhalasheeda la jaanqaaday ee dabbaaldeggeeda ka qaybqaatay, in badan oo ka mid ahi, waxa ay la sarakacayaan dareen taban oo hoosta ka xarriiqaya tabashooyin uga dhex muuqday sidii loo maamulayey midhihii ka dhashay gobannimada iyo Maandeeqdii mataanaysay ee candhadana gollaha marisay ee in la wada maalo la naawilayey.

Cali Sugulle (Duncarbeed) ayaa dareenkiisa taban hees ku wadaajinaya darandoorri ahaan barbaar iyo hablo ka mid ah kooxdii walaalaha Hargeysa ee xoriyadda iyo is-raaca geeraarrada iyo giblada u googooyeey ee ku gelbinayey dhawr sannadood hortood.

Inantii:

– "Hawshaan kula qaybsadaa
– Oo harraadkaan kula qabaa
– Oo anigu waan kula hayaa
– Ee adaan i hagaajinayn!"

Inankii:

– "Adduunyo hal baan lahaa
– Hashiina horror bayga dilay
– Oo hadhuub madhan baan sitaa!"

Inantii:

– "Halbowle siduu i go'ay

– Haab-haabtay wax aanan hayn!" iyo

– "Qadhqadhay roobka

– Qawqawlow qadhqadhay

– Qadhqadhay qaawanaantaydu arkaa

– Qadhqadhay ee qudhayda halkeen dhigaa!"

1961 waxa dhicisoobay inqilaab dhallinyaro saraakiil ahi isku dayeen in ay gobolladii waqooyi ka gooyaan kuwii koonfurta ee ay sannad ka hor la midoobeen.***Xasan-kayd Walanwal*** ayaa hormoodkooda ka mid ahaa, waxa na ku weheliyey saraakiil badan oo ay ka mid ahaayeen *Xuseen Cabdillaahi Bullaale*, *Siciid Cali Giir, Cabdi Xabashi iyo Cabdillaahi Congo*. Waxa raacay qaaddacaaddii aftidii Distoorka ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya ee 1961 ee Aadan-yabaalayska iyo Wallawaynaynta loo yaaqaanney.

Cabdillaahi Suldaan Timacadde oo, 1961, Gebilay ka mid ahaa dad ku soo dhowaynayey *Cabdirashiid Cali Sharmarke* ayaa geeraar soo dhowayn gob iyo caadkeed ah, duco, dardaaran iyo digniin ah goobtii soo dhowaynta ka tiriyey, isaga oo dareenka shacbiga ee gobolka guud ahaan cabbirayey, waxanu yidhi:

– "Maalintii dadku qiiqay een isticmaarkii is diidnay
– Nimankii danta sheegtaye dacwaddooda dhammaystaye
– Dalkan caawa la joogo dulligii isticmaarkiyo
– Karal daaqad ka saaraye duddadaanu ahayne
– Dawlad soo gashay miihine danteennaa laba diiddaye
– Dabuub aannu maqlaynay dareen baan ka qabnaaye
– Dugsigii barlamaankiyo dekeddii Xamar baa leh
– Berbera daadku ha qaado doonniyi yaanay ku weecan
– Labadaa ka la daaya'oo duqaydii barlamaankaay
– Yaan la daymo la'aaneey!

October 1962, waxa dawladdii Cabdirashiid iska casilay wasiirro reer Waqooyi ah oo dedaal ugu jirey in ay muujiyaan tabashada dadka reer Somaliland, iyada oo maalmo ka dibna ay xildhibaannadii golaha wakiillada ee Waqooyigu ku hanjabeen in ay ka bixi doonaan golaha wakiillada.

Hase yeeshee dedaalkaas siyaasadeed waxa wiiqay oo mija-xaabiyey mudanayaasha kala ah *Ibraahim Cismaan Food (Basbaas)* iyo *Yuusuf Ismaaciil Samatar (Gaandi)* oo loo kala magacaabay wasiirrada Ganacsiga iyo Wershedaha, iyo Waxbarashada sida ay u kala horreeyaan, raggaas oo loola shiray si qarsoodi ah, waxaay oggolaadeen in ay buuxiyaan jagooyinkii wasiirradu iska casileen.

"Inamada dhowaan ii kacaw waydin eersadaye
Afarteeda naas baan lahaa ubadka deeqsiiye
*Ma afurin agoonkii wadiyo kii ushaw sidaye"!-**Qaasim***

Ismaaciil Xalleef oo ka mid ahaa jaaliyaddii Cadmeed ayaa wax ka soo dhowaynayey Cabdirashiid Cali Sharma'arke oo booqasho Cadan ku yimi 1967. Gabay geeraarkaas sare ee Cabdillaahi Suldaan u dhigma ayuu ra'iisal wasaaraha uga tiriyey goobtii soo dhowaynta, waxanu yidhi:

– "Rashiid Cali sharma'arkow digtoor raahibaad tahay
– Raasada Berberi waa wadnaha Reer waqooyiga'e
– Kol se haddaad Kismaanyo u rartaan reerku kala guurye!"

Maldahanta sillan suganta loo yaqaan ee sarbeebta ku wada shareeran, isaga oo adeegsanaya, ayaa waxa uu ***Xasan Sheekh Muumin Gaafane*** maankeenna ku soo jeedinayaa hummaagyo farshaxan ah oo ka warramaya xaaladdii lagu jiray.

Gabadh iyo wiil haasaawaya ayuu hummaagiisa*Xasan Sheekh Muumin* inoo huwinayaa, waa dheeg ka mid ah heesihii Riwaaddiisii caanka ahayd ee ***Shabeel Naagood*** ee afafka badan lagu turmumay:

– Inanka:

– "Doc kastoo la eego
– Nolosha dunidu waa dabkee
– Hadduu dabkii dhaxamoodo
– Maxaa lagu diiriyaa?
– Waa tilmaan la daahoo
– Degdeg kuma habboonee
– Adoo deggan u fiirsa oo
– Ujeeddada i deeqsii?"

– Inanta:

– "Ruux haddii la doortoo
– Derejadii la saariyo
– Xilkii daryeeli waayaa
– Dab dhaxmooday weeye
– Waa su'aal da' waynoo
– Madaxa daalinaysee
– Wixii lagu diirinaayo
– Dadweynaha la waydiin!"

– Inanka:

– "Qofkii cudur dilaayo
– Dawadaa bogsiisee
– Hadday dawo bukooto
– Maxaa lagu dabiibaa?
– Waa tilmaan la daahoo
– Degdeg kuma habboonee
– Adoo deggan u fiirsa oo
– Ujeeddada i deeqsii?!"

– Inanta:
– "Dallaalimada diintiyo
– Distoorka iyo xeerkaa
– Haddii dabool la saaro
– Dawo bukootay weeyee
– Waa su'aal da' weynoo
– Madaxa daalinaysoo
– Wixii lagu dabiibi
– Dadweynahaa la waydiin?!"

Dareenka dadku waxa uu isugu dhafnaa tabashooyin caddaalad darro iyo dib-u-dhacii jiray ka soo jeeda, iyo saluug weyn oo ku suntanaa hungadii iyo natiijadii tabnayd ee midowga ka soo baxday.

Axmed Ismaaciil Diiriye (Qaasim) ayaa isna sannadahaas wax yar ka mid gabaygan ku cabbiray dareenkii shacbiga iyo hungada midnimadii loo jeellanaa, loona jibbaysnaa laga la kulmay iyo sida gobolladii maqnaa iyana loo illoobey.

Waxa uu Qaasim maan-diidayaa oo qaadan kari la’ yahay quusta iyo hungadaas la maggaabiyey, waxanu yidhi:

– *“Iliilaha Jabuutaan lahaa eedyar sii mariye*
– *Addis Ababa gee baan lahaa adhaxda jiilaale*
– *ENEFDII ha daaqdaan lahaa ayda doogga lehe*
– *Imminka na ardaa gocondhalay awr la miratаaye!”*

Mar kale iyo **Qaasim** oo tabasho tii ugu sarraysay maggaabinaya ayaa lahaa:

– *“Hashaan gaaxinayaan lahaa gorofka way buuxin*
– *Geyaxaha hashaan kaga xidhxidhay gabantii nuugaysay*
– *Geedkii magoolaba hashaan uga garaacaayey*
– *Gaaroodi iyo Hawd hashii laba gardaaqaysay*

– *Wax la yidhi “haddaa goodirkii lagu gabraartaaye”*
– *Wax la yidhi “gol baa lagu dabraa geed-waraabe lehe”*
– *Wax la yidhi “gujaa lagu lisaa labada gooroode”*

– *Wax la yidhi “gal daayeer cabbaa habari geysaaye”*
– *Golqaniinna waxa loogu daray yaanay gaagixine*
– *Wax la yidhi “gommode naasihii giigsanaan jiraye”*

– *Gobaad waxay la daaqdaa sagaal goroyacawloode*

– *Googooye iyo wiil xun baa gaawahaw sida’e*
– *Wallee ama gumooboo sidaa layga gallad haysay*
– *Wallee ama rag ways gaadayaa gacan ku ciil belay!*

1960 – 1969, waxa Jamhuuriyaddii Is-raacday ee Soomaaliya mayalka u qabtay xukuumado qabyaalad, eex iyo qaraabakiil, sedbursi, laaluush iyo maamulxumo ragaadiyeen.

Iska daa Soomaali la is la doonto oo la xoreeyo'e, waxa la kala irdheeyay labadii is-raacay 1960 oo budh iyo xoog lagu kala furfuray is-biirsigoodii.

Bishii Feb 1969-kii ayuu *Xaaji Aadan Axmed Xasan (Af-qallooc)* faallo daymooday gun iyo baar waayihii dalku ku sugnaa. Waxa meel walba daadsanaa oo ishu ku dhacaysey foolxumooyin ka dhashay doorashooyinkii hiirtaanyada badnaa ee ***'Food khasaaray'*** la magaca baxay iyo fadqalallooyinkii ay ku kacayeen ee ay samaynayeen axsaabtii siyaasadda ee doorashooyinkaas ku loollamaysey.

Xaajigu doorashooyinkaas wuu qaaddacay oo kama uu qayb qaadan, cidna ma siin codkiisa. Umal iyo ciil ku gaaxday ayuu goof la gelayaa, isaga oo aan geeriyoonna dhimasho isu dhigayaa oo xabaashiisii ayuu qodanayaa!

Waxa uu *Xaaji Aadan Af-qallooc* garasho daymoonayaa adduunyadii kale ee Soomaalida la midka ahayd ee lala gumaysanayey ee Afrika, Aasiya iyo Laatin-Ameerika oo dadkoodii guntiga marada lowga geeyey oo u tafa xaydan in ay hore u heetiyaan, qaarkoodna horumar la taaban karaba sameeyeen oo guclo orod ku jiraan, halka Soomaaliduna ay dib u sii guurayso oo dabada dib ugu siqayso, raad arooryana u raacayso.

Taas ayuu maan diidayaa oo laf dhuunta u taagan uga dhigmaysa.Waxa dareenkiisa damqaya oo maankiisa dhamac ku shidaya colaadaha iyo dirirta sida macno la'aanta ah uga dhisaalan Soomaalida dhexdeeda miyi iyo magaaloba, sida la isku wada biraynayo ee birta la iskaga wada aslayo, hiirtaanyada, godobta iyo aanooyinka uur-ku-taallada miidhan ah ee qabaliga ah ee Soomaalida dhex yaalla.

Waxa Xaajigu jalleeco galaa bixinayaa oo isha ku mudayaa nimankii doorashada galay oo halkan meel madhan soo wada tuban oo is wada gaadaya iyo waxa ay godob iyo utin daaqsadeen ee hareero tuuran. Karis xun iyana wax ku la'!

Horaase loo yidhi *'Hadduu doobi buuxsanmo inuu daato la arkee'*! Xaaji Aadan waxa uu ka foolinayey waayahaas cakirran ee hurgumooyinka iyo warmaha suntan leh ee dhiigaysan jiidanaya.Waxa uu oddorosay in gabbalkii u dhacay oo caleentoodu caddaatay xukuumadihii rayadka ahaa ee sagaalka sannadood mindada daabkeeda isu dhiib dhiibayey ee ummadda cidlada eeri go'anta ah ku ooday. Is beddel dhinac kasta ah oo dalka ka dhaca ayuu sadaaliyey.

Dhawr bilood ka dibna waxa dhashay Kacaankii ciidamadu hoggaaminayeen ee Oktoobar 1969.

Wuxaanu Afqalooc yidhi:

– Sidii aar gababoo ka jabay gaabatada lawga
– Oo gabannadii lagaga diley geedu hadhinaayey
– Oo nimanka godobtiisa qaba gur u jalleecaaya

– Oo aan itaal wuxu galiyo orod ku gaadhaynin
– Oo kayn intuu cadho la galay gawnaxyada buuray
– Goortaan garwaaqsaday dhibaha shicibka gaadhaaya

– Asaan gabay arrimo dhawr ahoo ila gudboonaadey

– Waa waxaan xabaalaha u galay geeri ka horoowe

– Cimrigii da' kula gaadhey waa guul darriyo ciile
– Kuwii aniga iga gaabin jirey baa i gees maraye

– Haddaanse amar Allaan laga gudbine gebi ahaan fiirsho
– Garashiyo ku dayashaan dayaxa gees la leeyahaye
– Isagoo geyiga nuurayuu guud maraa saxale

– Ma gudhsado adduunyada ninkii godol ka maalaaye

– Ninna keligii gaar uma ahee galabba waa meele

– Waagii guduutaaba waa waayo gooniyahe

– Hadba cirirku meeshuu galaa saxal u guuraaye

– Geyiga Eeshiyada khalqigaa gees walbaba jooga

– Geddigeed Afriikiyo Latiin gobol Amriikaan ah

– Gun baynnu u ahayn iyo addoon guud-caddaa Yurube

– Gumeysiga dad badan baa mutiyo guul-darriyo hooge

– Kolkay talo u soo guro-gashaye ferenjigii guurey

– Niman baa guntadey qaarna way gebi dhacleeyeene

– Ka gariiri Mow dunida gebi gaaliyo islaame

– Sabca miya malyuun baa gurdama goorta uu kaco'e

– Kuwii gadan jiruu Shiinihii haatan gaasiraye

– Aqal guradu weyn tahay Jamaal diid inuu galo'e

– Gasar lagu tilmaamiyo ma jiro daar u gooniya'e

– Ma gam'o ee habeenkii taluu gawda ku hayaaye

– Hadduu caawa go'o magacu waa midaan gaboobayne

– Geddaasuu siciim leeyahoo libin ku gaadhaaye

– Kuwii doorashada noo galaa gabay halkoodiiye

– Khalqigii oo horuu guurayey dib u gucleeyeene

– Googooye Soomaali oo gobolba meel aadye

– Guryaha iyo ceelkaa dartood laysku gawracaye
– Waa taa gamaaduhu bateen goobtii lays dhigaye
– Gildhigaanka waxa loo sitaa goosankii hadhaye

– Caawana kursi aad gaadhid baa guure loo yahaye
– Gurdan baan maqlaayaa sidii guuto weerarahe
– Gawaadhidu tolla'ay bay siddaa guuxu baxayaaye

– Kuwii guurey baa daaqad kale nooga soo galaye
– Gumeystaha jadiidaa aroos loo gelbinayaaye
– Waraabihii gol qabatada yiqiin geelu waw halise

– Goodaadsey calankii dhulkuu gaadho baw hadhaye
– Gobannimo xaqii ay lahayd geed fog lagu laalye

– Goblanse maaha Maandeeq hadday gabadin moodeene
– Wax kalaa dulqaad laga galaa laga geddoomaaye
– Ma garwaaqsan karo qoom xornimo laga ganaaxaaye

– Mar uun bay sidii aar la ganay gaydh la soo noqone
– Hadday geed darfuhu dheer yihiin gooya baa xigiye
– Xiddiggii gadaal-socod dhac iyo kii gardaadsadeye

– Gabbal gaabtay iyo baan arkaa gaawe buuxsamaye
– Gardarrada qun-yara xaal adduun gelinba waa cayne!

"Taariikhdu; tagtiyo joogtiyo timaaddaba; dadkay hagtaa, hagtaayee yaan taas loo daymo la'aan!"

Qaybta 4-aad:

Intay dhibibidee hore
Intay dhaqan xumaatiyo
Intay dhacantay Maandeeq
Midna kuma dhadhabayee
Yay dhalliili doonaan
Hadday dhamacdo maantana!!!

1. Dareenka Shacbiga (1887), Shacbiga:

"*BERBERI wax go' lagu qaado ka weyn!"*

2. Dareenka Abwaanka (1961), Timocadde:

"Dugsigii barlamaanka
Iyo dekeddii Xamar baa leh
BERBERA dadku ha qaado
Doonniyi yaanay ku weecan
Labadaa kala daaya oo
Yaan la daymo la'aan"!

3. Dareenka Abwaanka (1967), Xalleef:

"Raasada BERBERI waa wadnaha Reer Waqooyiga eh
Mar haddaad Kismaanyo u rarteen Reerkii kala guur!"

4. Dareenka Abwaanka (1982), Duncarbeed:

"Dekeddii BERBERI
Way dalooshantee
Ma daboolayaan!"

- Goodaadsey calankii dhulkuu gaadho baw hadhaye
- Gobannimo xaqii ay lahayd geed fog lagu laalye
- Goblanse maaha Maandeeq hadday gabadin moodeene
- Wax kalaa dulqaad laga galaa laga geddoomaaye
- Ma garwaaqsan karo qoom xornimo laga ganaaxaaye
- Mar uun bay sidii aar la ganay gaydh la soo noqone
- Hadday geed darfuhu dheer yihiin gooya baa xigiye
- Xiddiggii gadaal-socod dhac iyo kii gardaadsadeye
- Gabbal gaabtay iyo baan arkaa gaawe buuxsamaye
- Gardarrada qun-yara xaal adduun gelinba waa cayne! ***(Af-qallooc)***

21-kii Oct 1969 waxa Soomaaliya dhacay inqilaabkii milateri oo ka dhashay dareenkaas tabasho ee shacabka iyo taag-darradii xukuumadihii musuqmaasuqa iyo qabyaaladda ku caanka baxay ee rayadka ahaa.Hase yeeshee muddo yar oo rajo soo bidhiiqaysay iyo horumar la jaanqaadayey lagu suuxsanaa ka dib, waxa xaal noqday *"kud ka guur oo ganjo u guur".*Waxa ibo-furantay kelitalisnimadii la wada eeday ee maamulkii adkaa ee *Maxamed Siyaad Barre.*

Dagaalkii lagu jabay ee Soomaaliya iyo Itoobiya ee 1977/78, waxa uu sii qaawiyey cawridii taliskii Maxamed Siyaad Barre.Waxa la laayey oo toogasho badhka la taagey qaar ka mid ah labeentii saraakiishii dagaalka ka soo laabatay.*Axmed Maxamed Cashuur* (Somaliland) iyo *Maxamed Faarax* (Puntland) ayaa ka mid ahaa saraakiishaas oo siddeed ka mid ah Hargeysa lagu toogtay, tobannaan kalena Jigjiga markii laga soo baxayey ilaa jidka dhexe.

Inqilaabkii dhicisoobay ee ***Maxamed Cismaan Cirro*** hoggaaminayey ee 1979 ayaa fashilmay.Mucaaridkii taliska ku kacsanaa ayaa si abaabulan u abuurmay.

Somali Democratic Action Front (SODAF) ayay ku dhawaaqeen rag ay ka mid ahaayeen ***Cismaan Nuur Cali Qonof***, ***Cabdiraxmaan Saalax Axmed, Yuusuf Dirir Cabdi iyo Maxamuud Geelle***. Mucaaridkii tooska ahaa ee hubaysnaa ayaa isna samaysmay oo Jabhaddii *Badbaadinta Soomaaliya (SSF)* oo kol dambena noqotay *SSDF* markii xoogag afkaaraha bidixda aaminsanaa la midoobeen ayaa dagaal hubaysan iyo guluf ka soo qaadday soohdinta labada waddan ee Itoobiya iyo Soomaaliya.

Somaliland waxa ay noqotay goob goraygu ka hadaafay.Dib u dhicii guud ee nolosha dhinac walba ka taabanayey ee labadaas is-raacay ku habsaday, waxa u raacay oo u dheeraa dadkii reer waqooyiga cagajuglayn iyo cadaadis siyaasadeed oo xaaduqnimo. Markii loo garsheegtay na, taliskii Maxamed Siyaad galkuu seefta kala baxay.

Dhaqaalaha caasimadda labaad ee Hargeysa ayaa sii ragaadayey oo curyaannimo sii gelayey sida kii waddankuba u sii hagaasayey ee godka arxan darrada iyo hoogga ugu sii siqayey.Ganacsigii suuqa xorta ahi muddaba wuu ka laallaa Hargeysa oo ahaan jirtey xarun baayacalmushteri oo dadkeeduna yihiin xaruuriyiin khibrad iyo hoodaba u leh hawadinta hawlaha ganacsiga.

LC-yo dad gaar ah u xuurtaysan oo lagu naas-nuujiyo ayaa gaaggixiyey ibihii irmaanaa ee dhaqaalaha iyo ganacsiga. Waxa is taagey koritaankii iyo kobocii magaalada Hargeysa. Waxa hoos u dhac ku yimi daryeelkii iyo dayactirkii waddooyinka, biyaha ama laydhka oo habeenna la waayo, habeennana saacado go’an meelaha qaar ka bidhiiqa.

Hargeysa waxa ku yaalley cusbitaal keliya oo ahaa dhisme duug ah oo laga dhaxlay gumaysigii Britayn ee geyigaas xukumi jirey.Cusbitaalku ma lahayn laydh ama koronto. Marka haweeney foolanaysa la keeno waxa iftiin u ahaan jirey indhaha gaadhigii keenay oo inta albaabka la soo hortaago oo la istaadho la shidi jirey!

Dhakhaatiirta iyo shaqaalaha adeegga qaabbilsan ee cusbitaalkaas guud waxa ka badnaa bisaaska u soo hoyda ee isugu soo habar-wacday nadaafad darrada iyo dayaca rugtaas muhiimka ah ka jiray.Goob caafimaad waxa uu uga ekaa cusbitaalku qubuuro beri hore abaadey. Burco, Boorame, Berbera ama Ceerigaabo, Laascaanood iyo meelaha kaleba hoos bay Hargeysa ka sii xigeen. Waxa aad moodaysey in gobolkaba lagala dagaalamayey horumar oo dhan, loona sadqaynayey oo lagu sooryeynayay dib u dhac oo dhan.

Hoos u dhacaas oo si xawli ah isu soo tarayey maalin kasta sannadihii u dambeeyey ee kala guurkii labadii tobanle ee 1970 iyo 1980-aadkii, waxa uu toosiyey oo kiciyey, dabna ku oogey dareenkii dadka, gaar ahaan waxa ka gilgishey garashadii aqoonleyda iyo waxgaradka reer Hargeysa. Waxa arrimahaasi kulmiyeen koox dhallinyaro ah oo ka mid ah macallimiintii, dhakhaatiirtii, shaqaalihii iyo baayacalmushterigii magaalada.

Waxa ay dhallinyaradu daraaseeyeen inta dhibaatadu hoos u qodan tahay iyo sida ugu sahlan ee xalkeeda loo furdaamin karo.Waxa ay ka badin waayeen oo go'aansadeen in ay si *"iskaa wax u qabso"* ah ay ugu adeegaan dadkooda qanja bararku ku yuurursaday.Waxa ay la xidhiidheen maalqabeenkii magaalada intii Hargeysa ku sugnayd iyo intii ka haajirtey ee meelo kale ku noolaydba.Waxa kale oo ay la xidhiidheen maamulkii dawladda ee gobolka.

Dhega-nuglaan iyo jajabnaan ayay cid kasta kala kulmeen in ay ka helaan marka laga reebo dawladdii dalka maamulaysey oo ku gacmo saydhay, kuna eedaysay in kooxdaas dhallinyarada ah ay ka dambeeyaan oo ku adeeganayaan wax ay ugu yeedheen '*quwado shisheeye'*!
Halkaas waxa ka soo if-baxay weji-gabaxii ugu waynaa ee waxgaradkii Hargeysa iyo maamulkii Muqdisho. Waxa wiiqmay oo xar galay udub-dhexaadka kalsoonidii la bakhti afuufayey ee shacabka Gobolka iyo Dawladda, waxana hungoobey hankii u heellanaa "*iskaa wax u qabsiga*"!

6-dii April 1981 ayaa London laga shaaciyey yagleelka dhaqdhaqaaqii ***SNM*** ee ka horjeeday maamulkii kelitaliska ahaa ee Gen. Maxamed Siyaad Barre ee Soomaaliya ka calanwallayn jirey. Arrimahaas dib u dhacyada iyo cadaadiska siyaasadeed ka koobnaa waxa ay soo dedejisay in dabayaaqadii sannadkii 1981-kii xabsiga loo taxaabo dhallinyaradaas oo lagu eedaynayo inay duminayeen qarankii ay doonayeen in ay dhisaan.

Ficiladaas samadawdarnimo waxa ay sababtay kacdoonkii ardaydu hagayeen ee Hargeysa ka dhacay bishii Febarweri 20-keedii illaa 23-keedii ee sannadkii 1982 maalintii Sabti ee maxkamadda la keenayey dhallinyaradaas xidhxidhnayd ee ***UFO***. Madaxaa ha ku furto iyo xadhig muddo dheer ah ayaa dhallinyaradaas lagu kala xukumay, waxana loo dhaadhiciyey xabsiyadii koonfurta ee *Labaatan Jirow* ka midka ahaa.

Wefti niman madax ahaa oo reer waqooyi ahi hoggaaminayaan ayuu Maxamed Siyaad Hargeysa u soo diray, si ay dabka u soo bakhtiiyaan, waxana ka mid ahaa: ***Axmed Saleebaan Cabdalle (Ina Dafle), Axmed Maxamud Faarax (Ina Lax-was) AHUN, Jaamac Gaas Mucaawiye (Dadweyne) AHUN iyo Xasan Suudi Xirsi.****Cali Sugulle* ayaa diyaaraddii weftigaas siddey soo raaciyey si qarsoodi ah cajaled dareenkii shacbiga xambaarsan oo uu *Cali* Muqdisho ka soo diray markii ay Hargeysa soo gaadheyna suuqa lagu farraqay.

Waxana dareenkaas ka mid ahaa:

Ina soo Dafiyo
Ina Daylo kude
Dulli Jaamac Gaas
Guulwade dadbane
Iyagaa dulmanoo
Loo doodayee
Maxay doonayeen?
Dadku wuu bukee
Ma dawaynayaan?
Dekeddii Berbera
Way dalooshantee
Ma daboolayaan?!
BERBERI yaab badanaa!

Ururkii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed (SNM):

Marxalado iyo xaalado kala duwan ayaa SNM halgankeedu soo maray min abaabulkii hore ee ballaysinka ahaa, ku dhawaaqii rasmiga ahaa, u banbixii goobaha naf-hurka iyo bilowgii dagaalka hubaysan, dhammaystirkii hawlaha dib u xoraynta, illaa wareejintii talada iyo dhalashadii Somaliland.

Taariikhdaasi si dhab ah oo garashaysan oo ka baxsan soohdimaha caaddifadda iyo qiirada ama jibbada ogaalkayga loo ma qiimayn, si mug leh na waxba loogama qorin marka laga reebo in kooban oo hal-karaanle ah.

Muqdisho ayaa la tilmaamaa abaabulkii hore ee SNM in uu ka bilaabmay nuskii dambe ee tobanlihii 1970-aadkii.Madaxdii sare xukuumaddii Soomaaliya rag ka mid ah oo kaashanaya qaar ka mid ah saraakiishii ciidamada qalabka sida iyo amniga iyo waxgarad kale ayaa ku dhaqaaqay abaabul qarsoodi ahaa oo dareenkiisu daarranaa in laga horyimaaddo oo lagu kaco siyaasaddii ka sii daraysey ee xukuumadda.Madaxdaas iyo kooxaha ay abaabulkaas la wadeen waxa ay ka soo jeedeen Gobolladii Waqooyi.

Ismaaciil Cali Abokor iyo Cumar Carte Qaalib ayaa madaxda sare ka mid ahaa hormoodkooda.Dhanka saraakiisha waxa foolaad u ahaa ***Maxamed Xaashi Diiriye (Lixle) iyo Axmed Maxamed Halac*** labadooda ba AHUN.

Kelitalisnimadii waddanka ka jirtey cabsi iyo baqdin la xidhiidha, iyo kalsooni-darradii iyo kala shakigii dadka lagu dhex beeray ayaa keenaysay in si qarsoodi ah wax lagu wado, hab-raac qabali ahna la isugu xidhmo oo loo wada xidhiidho, waayo talisku isagaa inta uu qabyaaladdii dadka ku yidhi "*ha la aaso*", haddana iilka iyo luxudkii la jiifiyey dadkii u daba maray oo ka soo qufay oo dibedda ula soo baxay, madaxtooyadiisana la yimi oo ku rabbaystay iyada oo miciyo libaax yeelatay.

Goobta labaad ee abaabulka hore ee SNM ka socday waxa ay ahayd Sucuudiga oo ay ku noolaayeen waxgarad gobolladaas ka soo jeedey oo waa' hore badankoodu dalka ka haajirey.

Labadaas qolo ee gudaha iyo dibedda abaabulkaas kaga foognaa waxa la tibaaxaa in ay is ogaayeen, haddana aanay lahayn himilo guud mooyaane hadafyo hoose oo ku salaysan sida wax loo yagleelayo iyo sida himilada iyo higsiyada gaadhitaankooda la isku waafajinayo.

Waxa kale oo jirtey in labada qolo hawluhu u kala fududaayeen. Qolyaha guduhu waxa ay ku jireen af libaax oo way ka halis badnaayeen dhiggoodii kale ee Sucuudiga hawsha ka wadey oo haystay xorriyad ta qolyaha gudaha ka roon iyo u madaxbannaan hawsha ay qabanayeen abaabulkeeda.

Si kasta ba ha ahaato'e qolyihii dibedda ayaa magacii yeeshay oo London kaga dhawaaqay SNM 6-dii April 1981.Suurta gal ma ahayn in Sacuudiga urur dabeecaddaas leh laga dhisaa ama lagaga dhawaaqaa.Sidaas darteed ayay kooxdaasi inta ay dhigeen wixii ay gacanta ku hayeen ugu hulleeleen waddanka Boqortooyada Ingriiska, iyaga iyo koox kale oo halkaas sii joogteyna sannadkaas SNM ugaga dhawaaqeen.

Qolyaha Sucuudigu waxa ay soo direen rag ay ka mid ahaayeen ***Sh. Yuusuf Sh. Cali Sh. Madar, Axmed Ismaaciil Cabdi (Duqsi) iyo Xasan Aadan Wadaad-diid*** saddexda ba AHUN oo noqday horseedkii halganka hubaysan, waxa weheliyey ragga ay ka mid ahaayeen ***Prof Cabdisalaan Yaasiin Maxamed, Axmed Maxamed Jaamac Dable iyo Axmed Maxmed (Seyidi).*** London waxa kaga biiray qolyahaas Sacuudiga ka yimi rag ay ka mid ahaayeen ***Axmed Jimcaale (AHUN), Xasan Ciise Jaamac, Cali Cabdilqaadir, Axmed Saylici iyo Siciid Cabdillaahi Cigaal*** oo xilli dambe taliskii Maxamed Siyaad dib ugu laabtay.

Ku dhawaaqaas SNM wax weyn ayuu ka beddelay siyaasaddii dalka, waxaana abuurmay xiisad iyo jawi tuhunno siyaasadeed iyo qaar qabali ah huwanaa oo kala gurasho iyo xeelado dahsoonba lahaa. Waxa kordhay oo baallaha fidsaday cadaadiskii maamulayaasha talisku dadka ku hayeen.Sidii aynu soo xusnay waxa Hargeysa lagu xidhxidhay dhallinyaradii UFFO, waxa qarxay gadoodkii ardayda 20-kii Feb 1082.

1-dii May 1982 waxa magaalada Burco ka dhacay muddaharaadyo ka dabqaadanayey kuwaas Hargeysa ka qarxaday. Muddo ka dibna waxa la xidhxidhay xubno ka mid ah dawladdii MS Barre, ayna ka mid ahaayeen *Ismaciil Cali Abokor, Cumar Carte Qaalib, Maxamed Sh. Aadan* iyo dad kale oo badan oo isugu jira saraakiil ciidammo iyo sifilba leh, iyo waxgarad kala duwan oo ka soo jeeda gobolladii Waqooyi.

Tuulada *Dharkayn-geeye* ee Gobolka Buuhoodle waxa maxkamad milateri badhka taagtay oo si foolxun loogu toogtay ***Col. Cabdillaahi X. Siciid Cabdi*** *(AHUN*) oo ka mid ahaa saraakiishii ugu qiimaha badnayd XDS, taas oo dareen weyn ku dhalisay oo dhiillo gelisey saraakiil badan oo ka soo jeeddey gobolladii waqooyi.

Saraakiishii ugu horraysay ayaa ka gudubtey xuduudda oo u tallowday dhanka Itoobiya.***Maxamed Cali Faarax (AHUN***) iyo Jabhaddii Afraad ayaa ka xidhiidh furtay ciidamadii Soomaaliya.***Aadan Sh. Maxamed (Aadan Shiine,*** *AHUN****), Axmed Dhagax (****AHUN****)*** *iyo* ***Maxamed Kaahin Axmed***, ayaa ka goostay saraakiishii ciidamada.Dawladdii Itoobiya ayaa saraakiishaas u soo jeedisey in ay ku biiraan SSDF oo saldhigyadeeda ciidameed daadsanaayeen soohdinta u dhaxaysa labada waddan min *Goraya-cawl* oo galbeedka Hargeysa ku qumman ilaa koonfurta shishe ee Soomaaliya.

Saraakiishaasi waxa ay diidmo ku qaaddeceen codsigii Itoobiyaanka, waxanay u sheegeen in ay ka mid yihiin Ururka SNM oo markaas fadhigiisu ahaa London.Halkaas waxa ka bilaabmay digorogashadii maamulka ee SNM uu Itoobiya ugu soo guurey. Markii ay SNM hoggaankeedu Addis-ababa ka soo degey, waxa dawladdii *Mingiste Hailu Mariam* oo tixgelinaysa culays kaga imanayey dibedda, gaar ahaan, Yemen iyo Liibiya ay hordhigtay hoggaankii cusbaa ee SNM hindise uu qorshihiisu ahaa in ay la midoobaan SSDF.

Caqabaddii ugu waynayd ee ugu horraysay ee ay Itoobiya tegitaankeeda kala kulmaan kooxda SNM ayaa ahayd culayskaas siyaasadeed ee ku yimi oo ahaa in ay ku biiraan oo xoojiyaan jabhaddaas Soomaaliyeed ee kaga horraysay ee fadhiisimada Itoobiya ku lahayd.

SSDF waxa ay lahayd cudud ciidan oo xoog leh oo ka garab dagaallama ciidamadii Mingiste iyo awood dhaqaale oo kaga furrayd tuunbooyinkii xoorka badnaa ee Qaddaafiga Libya ee dhowaan halligmay.

Hoggaankii SNM ee Itoobiya tegey oo awel ba ay u guntanaayeen gocashooyin iyo hibasho ka soo jeeda habkii is raaca Soomaalida labada gobol ee 1960 ee degdegga iyo jibadda ku salaysnaa iyo natiijooyinkii ka soo baxay, ayaa hadimo kale u arkay salfudayd iyo hubsiino la'aan kale oo ay maanta na mar kale cid kula midoobaan sida SSDF oo markaas taas ka quuddarraynaysey!.
Hoggaankii SSDF oo kaashanaya Itoobiya iyo Libya iyo qolyihii kale ee gacansaarka la lahaa ee Koonfurtii Yaman iyo Cuba, waxa uu geed dheer iyo mid gaaban ba u fuulay in kooxdan yar ee cusub aan faran kale iyo saldhigyo loo oggolaan, kuna soo biiraan oo hoos yimaaddaan hoggaankiisa.

Hal-adayg uu muujiyey hoggaankii kooxda SNM iyo saraakiil badan oo hoggaankaas taageersan oo gudaha ka soo tallowday iyo Jebintii *Xabsiga Mandheera* oo la haystayaal siyaasadeed ku jireen oo laga soo daayey ayaa kor u qaadday sumcaddii iyo aqoonsi siyaasadeed oo kooxda SNM Itoobiya ka helaan, taas oo jebisay xummaddii iyo hungurigii hoggaanka SSDF, horseedday na sii kala fogaansho iyo shaki labada hoggaan ka dhex hanaqaada oo waayaha halganka iyo labada jabhadood la sii guurguura oo raaca.

Ururkii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed ee SNM waxa uu ahaa urur halgameed shacbi oo dib u xorayneed.Waxa ururkaasi marxaladihii uu soo maray kulmiyey dad kala duwan oo afkaaro kala duwanna kala walwaalayey oo xambaarsanaa.

Arrinta goosiga ama lasoo noqoshada Somaliland ee Gobolladii Waqooyi fikir ahaan mar wal ba oollimaad waxa uu ku lahaa ururka dhexdiisa. Hase yeeshee wixii 1988 iyo guda-galkii iyo burburkii weynaa ka horreeyey waxa afkaartaas aaminsanaa inta ugu yar dadkii SNM ka midka ahaa, mararka qaarna waxa ay ahayd ba afkaar shiiqday oo cidi ba kama wada hadli jirin.Taasi in ay jirto la yaab ma lahayn oo waxa aynu soo xusanay in 1961 uu soo if baxay dareen goosasho markii koox saraakiil ahi u hollatay in ay jaraan gobolladaas oo midowgii dib uga noqdaan.

Dadka qubanaha ah ee SNM isugu yimi badankoodu waxa ay afkaar ahaan rumaysnaayeen in aan waddanka la kala jarin, hase yeeshee waxa loo badnaa oo la aaminsanaa in wax laga beddelo oo dib loogu noqdo qaabkii degdegga iyo jibbada ku salaysnaa ee midnimada labada gobol u dhacday 1960.

Hab federaal ah in midowga labada gobol lagu saleeyo fikir ah ayaa maskaxda inta badan ka guuxaysey, walow ay jireen kooxo xitaa aan federaalka ba la dhacsanayn oo lahaa taliska ha la tuuro, caddaaladda iyo maamul wanaaggana ha la sugo uun.

Intaas iyo afkaaraha arrintaas ee dadka dhex yaalley marka laga yimaaddo ee loo kaco dhanka mabaadidii guud iyo barnaamijkii siyaasadda ee SNM waxa kuu soo baxaya sawir kale oo afkaarahaas macnaynaya. Qodobka 6-aad ee distoorkii SNM u dhignaa waxa uu qorayey: *"Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed wuxuu aaminsan yahay in la xoreeyo Soomaaliya oo idil, lana ilaaliyo midnimadeeda"*.

Waxa kale oo arrinta hoosta ka sii xarriiqaya in SNM saldhigyo ku lahayd jiidaha xuduudda ku teedsan ee ku foorora gobollada Hiiraan, Gedo, Bay iyo Bakool.Laga bilaabo 1984 waxa guddiyada fulinta iyo golaha dhexe ee SNM ka mid noqday xubno tiro badan oo Reer Koonfureed ah.Waxa hormood u ahaa xubnahaas ***Cali Maxamed Cosoble "Wardhiigley"*** oo AHUN ahaa siyaasi caan ahaa oo reer Muqdisho ah, noqdayna guddoomiye ku xigeenkii SNM xilligii guddoomiyennimada uu qabtay ***Axmed Maxamed Siilaanyo***.***Cali Hagarrey, Cabdinaasir Sh. Cali, Cabdi Karuur, Khaliif Dheere, Col Gorgor iyo Sheekh Yarow*** ayaa ka mid ahaa ragga kale ee miisaanka lahaa. Intooda badani raggaasi way geeriyoodeen oo in badani halganka ayay ku naf waayeen AHUN.

Cabdixakiim Ismaaciil X. Axmed oo ahaa xoghayntii SNM ee 1990-aadkii, haddana Oslo ku nool, ayaa ila wadaagay xogo uu kaydiyey oo arrintan la halmaala. Waxa ka mid ah xogtaas heshiish laba docood ahaa oo Muqdisho ku dhexmaray 8-dii August 1991 ururradii USC iyo SNM.

19-kii Julay - 8-dii August 1991 ayaa wada hadallo labada dhinac u socdey waxa go'aannadii la gaadhey ee qalinka lagu duugay ka mid ahaa:

- In labada urur u adeegaan sidii loo wada yeelan lahaa midaynta siyaasadda dibedda, barnaamijyo mashaariic horumarineed, manhajyada waxbarasheed, lacagta iyo gaadiidka iyo is gaadhsiinta
- In ay isku furnaadaan isku socodka ganacsiga labada shacbi, lana kobciyo xidhiidhka hiddaha iyo dhaqanka, si loo xoojiyo gacaltooyada iyo walaaltin nimada.

Wada hadalladaasi xallinta dhibaatooyinka ummadda Soomaaliyeed waxa ay u dhaafeen in ay u taallo dadkeeda. Aayo ka talin wixii ku saabsanna dhib baa loogu riixay xilliyo dambe.

Dhinaca weftiga SNM waxa go'aannada wada hadalladaas u saxeexay ***Saleebaan Maxamuud Aadan*** oo hadda ah guddoomiyaha golaha guurtida Somaliland, markaas na ahaa guddoomiyaha weftigaas. Dhinaca USC waxa heshiiskaas u saxeexay ***Gen. Maxamed Faarax Caydiid*** oo AHUN ahaa guddoomiyihii USC.

Garannay haddaba oo SNM mabaadi ahaan ma aaminsanayn in Gobollada Waqooyi ka go'aan Soomaaliya, walow ay jireen afkaaro dad aan badnayni qabeen oo go'itaan u guux ahaa.SNM mabda’ ahaan ma aqoonsanayn in Gobolladii Waqooyi go’aan, hadda na gacmaheeda ayay ku go’een!

Halkee ayay tolow wax iska qardhaafsan yihiin?!

Ururkii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed waxa uu u taagnaa xoraynta Soomaaliya idil ahaan iyo ilaalinta midnimadeeda. Magaaladu Burco ayaa haddana SNM kaga dhawaaqday 18-kii May 1991 gooni isu taagga Gobolladii Waqooyi iyo yagleelka Jamhuuriyadda Somaliland.

Arrintan waxa ka dhex muuqda isirro is burinaya, isna diidaya oo iska hor imanaya. Waa u taagnaanta ilaalin midnimo iyo fulinta kala qaybineed! Arrin sahlan taasi runtii ma aha! Hase yeeshee wax aan sabab lahayni iska ma dhacaane, bal aynu sababo dhawr ah oo is biirsaday, kala se horreeyey, is la gorfayno.

Sababta 1-aad

Maskaxda iyo dareenka in badan oo ka mid ah Reer Waqooyigii lixdii garaadka lahaa iyo intii markaas soo kacaamaysey, waxa saamayn xun ku yeeshay natiijadii iyo midhihii ka dhashay is raacii labada gobol 1960. Gocosho quluubta ku daxalaysatay iyo tabashooyin in la damqo mooyaane aan weligood in la daweeyo la isku deyin, ayaa halkaas ka abuurmay oo nolosha oo dhan ku milmay oo raac raacay xilliyo xidhiidhsanaa.

Inqilaabkii dhicisoobay ee kooxdii saraakiisha ee 1961 ayaa dhacdo dareenkaas cabbiraysa ahaa.Diidmadii qayaxnayd ee aftidii distoorka ee isla 1961 ee dadweyanaha Gobollada Waqooyi intooda badani qaaddaceen ayaa dareen muujin kale ahayd.Gabayadii iyo geeraarradii Qaasim, Timocadde iyo Ismaaciil Xalleef hal-abuurka ay ka mid yihiin ay 1960-aadkii tiriyeen ayaa dareen muujin kale oo shacbi ahaa.

Taas oo jirta oo horumar la’aanta iyo dib u dhacyada guudna Soomaaliya laga wada sinnaa, ayaa haddana waxa Reer Waqooyiga intiisa badani tirsadeen cadaadis siyaasadeed oo gaar ah oo mararka qaarna qorshaysnaa ba sida dadka qaar qabaan. Saami iyo awood qaybsiga guud ee xilalka waa weyn ama muhiimka ah ee qaranka ayaa isir kale ahaa oo mar walba isu dheelli-tirku ka maqnaa sida in badani ku qanacsan yihiin.

Dhacdooyinkaas la soo jiitamayey nolosha kufaa-kaceeda waxa ka dhashay SNM. Markii ay SNM abuurantay na waxa la jaanqaaday cadaadis siyaasadeed oo hor leh iyo gumaadyo dadweyne oo aan loo aabboyeelin, in kasta oo maamulkii kelitaliska ahaa cid kasta oo ka hor timaadda cagta marinayey sidii ka dhacday gobollada Bari, Nugaal iyo Waqooyiga Mudug sannadihii 1978 – 1982 markii Inqilaabkii Cirro hoggaaminayey dhicisoobay, SSDF na la yagleelay.

Sababta 2-aad

Burburkii weynaa ee 1988 iyo gumaadyadii taxnaa ee qorshaysnaa ee dadka Isaaqa lagu bartilmaansanayey iyo *"Xabaalo Wadareedyada"* ka hadhay nin kastaa ba ha iska hadlee waa sabab kale oo dareenka dad badan saamayn taban ku yeelatay.

March 1988 waxa uu Maxamed Siyaad heshiis kula galay Jabuuti dhiggiisii Itoobiya ee Mingiste oo SNM saldhigyo ka siiyey dalkiisa.May 1988 SNM dabadeed iyada oo maqiiqan ayay madaxa isugu tuurtay obocda gobollada waqooyi. Waxa dhacay wixii dhacay!

Diyaaradihii xoogga dalka Soomaaliyeed ayaa ka haaday garoonka diyaaradaha ee Hargeysa oo duqeeyey isla magaalada Hargeysa oo xukuumaddii Barre gacanteeda ku jirta! Xamar na*"Xeebtii Geerida"* iyo falal kale ayaa ka socday!

Sababta 3-aad

Waxaas oo u dhacay hore iyo gadaal ba, ayaa la tuuray taliskii Jaalle Maxamed Siyaad bilowgii 1991.Ururkii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed waxa uu gacanta ku dhigay gobollada waqooyi.Koonfurna waxa ka sii socday dagaallo, in kasta oo USC gacanta ku qabatay meelo badan oo Muqdisho ka mid ahayd.

Intii Siyaad Barre ba joogey, markii la garwaaqsaday in aan wakhti u sii laabnayn oo taliskiisii dumayo, jabhadihiina waddanka qabsan doonaan, ayaa waxa Muqdisho laga abuuray Manifesto Group looga gol lahaa in ay diyaariyaan ciddii xukunka Maxamed Siyaad ka dhaxli lahayd. Ragga kooxdaas ka dhex muuqda waxa ka mid ahaa: *General Maxamed Abshir Muuse, Ismaaciil Jimcaale Cosoble,Aadan Cabdulle Cismaan, Xaaji Muuse Boqor iyo Sheekh Mukhtaar Maxamed Xuseen.*

Ayaan-darro, kooxdaasi waxa ay sameeyeen khalad weyn oo taariikhi ah, waxa aanay ku khammaareen taladii iyo masiirkii Soomaaliya dal iyo dad ahaan ba. Waxa ay sameeyeen Jan. 1991 dawlad aan laga la tashan, wax na laga waydiin Ururkii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed ee xoreeyey, gacanta na ay ugu jireen gobollada waqooyi!

Gen. Caydiid oo Manifesto kaga hor yimi mawqifkoodu na dibedda ayaa loo tuuray oo waxa la dhisay *Cali Mahdi Maxamed* iyo xukuumaddiisii. Muqdisho na waxa ay u qaybsan tahay laba xaafadood oo aan dabka kala qaadan.

Hargeysa iyo Burco waxa BBC-da laga dhegaystay in Soomaaliya oo ay iyaguna ku jiraan loo dhisay dawlad cusub! La isku yaac oo la la yaab, waxna la iska waydii. La ye "jinnaa wadaad ah"!

Ladh iyo dacar is walwaalanaya ayaa maanka iyo maskaxda dad badan ku soo kacay oo arrintaasi ku abuurtay. Fursad weyn waxa helay dadka qaar, gaar ahaan siyaasiintii gooni isu taagga maskaxda ku haysay ee u hanqal taagi jirtey.

Tan Muqdisho ka dhacday maalintaas ee raadkeedu qoyan yahay ee Manifesto, tii is raaca ee 1960 iyo natiijooyinkii ka dhashay oo burburka iyo maydka yaallaa dadka u muuqdaan iyo tii Cabdullaahi Yuusufkii SSDF ee Itoobiya iyo Libya u kaashaday in uu kooxdii SNM sidatey ee cusbayd afka u dhigto oo sandulle hoggaankiisa u hoos keeno 1982, ayaa sida *"sandwich-ta"* rag rag ahi inta ay isu saareen, waxa ay ka iibiyeen shacbigii gobollada waqooyi ee umalka iyo cadhada weyni haysay intii ugu badnayd, gooni isutaag, waa na laga iibsaday.

Waxa la maquuniyey oo waddo cad la mariyey dhigaalladii distoorka SNM iyo intii aqoonsanayd ba, gaar ahaan qodobka 6-aad: *"Ururka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed wuxu aaminsan yahay in la xoreeyo Soomaaliya oo idil, lana ilaaliyo midnimadeeda*".

Intii hunguri kaga jirey in wax la hojiyo oo dhinacyo kale wax laga eego na qori caaraddii ayaa shacabkii dhafoorka iyo dhegta kaga qabtay oo lagu yidhi *"gooya gooya, ku dhawaaqa oo hadda gobollada waqooyi gooyo, Somaliland na ku dhawaaqa*"!

Halgankaas SNM waxa uu ahaa halgan shacbi oo talo-wadaag iyo wada-tashi hoggaamintiisu ku suntanayd.Shan guddoomiye ayaa iska beddelay hoggaamintiisa muddo toban sannadood ka yar oo halgankaasi xawli ku socdey.

Waxa ay kala ahaayeen sidan ay u kala horreeyaan:

1. Axmed Jimcaale (AHUN)
2. Sheekh Yuusuf Sheekh Madar (AHUN)
3. Cabdilqaadir Koosaar Cabdi (AHUN)
4. Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo)
5. Cabdiraxmaan Axmed Cali (Tuur) (AHUN)

Kumannaan halyey ayaa u naf waayey oo aan maanta meelna ku diiwaan gashanayn, hase ahaato'e wada "*DALJIR DAHSOON"* ah.

Waa halkii uu ***Rashiid Sheekh Cabdillaahi X Axmed (Gadhweyne***) maalin dhowayd xuskii 18-ka May 2015 ka lahaa xafladdii Sheffield :
"Qaladka ugu weyn ee aannu samaynay haddii aannu nahay madaxdii SNM waa diiwaan-gelin la'aanta aannaan raggii dagaalladii halganka ku shahiiday ama ku naafoobey ee ku dhaawacmay aannan diiwaan-gelin u samayn.Maanta dalkeenna kii gaadhi jiidhay, kii awr cunay iyo ku waliba waa mujaahid!"

Aafooyinka qoraal la'aanta iyo kaydin la'aanta xogta iyo wacaalaha taariikheed qof iyo wadarba ha la xidhiidho'e waa kuwa sidaas u foosha xun ee keenaya hafriinyaha iyo sheelidda ama shareeridda wixii dhab iyo xaqiiq ahaa iyo quwaynta beenta isku maldahaysa runtaas daaha ka dambaysa.

Hal kalaan xusuustay oo taas Rashiid Gadhweyne igusoo kicinaysaa ladhkiisa.SNM waagii aannu halganka ku jirnay ee goobaha naf waaga aannu ku sugnayn waxa SNM ka mid ahaa dad badan oo kala duwan aragti ahaan iyo qolo ahaan ba. Reer bay SNM mar walba u badnayd

(Isaaq), hase yeeshee reeraha kalena kama maqnayn oo mar walba cid baa ka joogtay tiro kasta ciddaasi ha ahaato'e.

Laba arrimood baa muhiim ah oo maanta qiimayntooda leh, una baahan in la diiwaan geliyo. Saddex halgamaayaa ayaa maskaxdayda ku jira oo ka mid ah dadkii aan Isaaqa ahayn ee SNM la bilaabay halganka, lana dhammeeyey ee ilaa dhisiddii iyo yagleeliddii Jamhuuriyadda Somaliland waranka iyo gaashaanku degta u saarraayeen, halka qaar badan oo la mid ahaa iyaga ay taas u dulqaadan waayeen.

Waxa ay kala yihiin:

1. Cabdiraxmaan Aw Cali Faarax (Samaroon)
2. Yaasiin Axmed X Nuur AHUN (Dhulbahante)
3. Faarax Axmed Cali –Gamuute- (Majeerteen)

Saddexdan halgamaa waxa ay gashadeen qoloftii diinka. Waxa ay u dulqaateen wax badan oo iyaga gaar u ahaa oo dhegtooda ku dhacayey, dhaayahoodana ay ku arkayeen.

Arrinta labaad ee diiwaan-gelinta u baahani waa in aasaasayaashii SNM ee Sacuudiga iyo London ka yimi ee Itoobiya SNM ula soo guuray ku kala tegayaan sidaas oo kale qiimaynta maanta. Rag baan maalin keliya goobaha naf-hurka iyo halganka hawlihiisa ka bixin oo sida qolyaha sare ku xusan ku sifoobaya ma debcayaal. Waayo rag khayrkood iyo aynigood ah ayaa taas ka gaabiyey ama buuxinteeda ku guuldarraystay.

Hormuudkii yagleelkaas SNM ragga sifada ma debcayaasha yeelanaya waxa ka mid ah oo illaa dhisiddii Somaliland halganka dhex joogey oo gayllamayey:
Sheekh Yuusuf Sh. Cali Sh.Madar oo ahaa guddoomiyihii 2-aad ee SNM, markii xilkaas laga wareejiyeyna 1983 ku adkaystay in uu isaga oo xubin ah halganka sii wado, wadeyna ilaa u ka god galay AHUN, halka dhiggiisii la midka ahaa markii ay xilalka wareejiyeen iska tageen ama lugna dibedda dhigteen, maalinta doorasho soo dhowaatana lugta kale goobta halganka la soo geli jireen amaba qaarkood iska ba danaysteen oo halgankaba ka hawl-qabeen.

Ragga aan Sheekh Yuusuf ka dhicin waxa ka mid ah:

Maxamed Xaashi Cilmi
Xasan Ciise Jaamac iyo
Axmed Maxamed Seyidi

Intay dhibibidee hore
Intay dhaqan xumaatiyo
Intay dhacantay Maandeeq
Midna kuma dhadhabayee
Yay dhalliili doonaan
Hadday dhamacdo maantana!!!
Hadda mar kale maantana!

Axmed Maxamed Warsame (Axmed Genius) AHUN, waxa uu maansadan (Dharaaraa na soo maray) ee meerisyadan aan ka soo garoocay ka tiriyey shirweynihii 4-aad ee SNM 6-dii Aug 1984.

Saddex bilood ka didna waxa uu *Axmed Genius* ka mid ahaa raggii dagaalkii buuraha ee gudaha galay, halkaas oo uu ka mid ahaa dhallinyarada, labeentii iyo aqoontii SNM ee dagaalladaas ku shahiiddey. Tobannaan arday, macallimiin iyo aqoonley kale ahaa ayaa maalmahaas naftooda u hibeeyey oo u horay qarannimadan lagu wada naalloonayo ee laga wada macaashay!

Qaybta 5-aad:

18-kii May 1991, ayaa si ninkii goobjoogga ka ahaa uu inoo sawiri karo uun, waxa Burco lagaga dhawaaqay gooni isu taagga Jamhuuriyadda Somaliland.***"Nuur iyo Naalleye"*** ba waa loo wada dhammaa maalintaas Burco loo ma kala maqnayn dadkii ku noolaa Somaliland ***"Dir iyo Daarood ama Bari iyo Bogox ba"***.

Hoggaankii Ururka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed oo uu markaas guddoomiye u ahaa Alle ha u naxariisto 'e ***Cabdiraxmaan Axmed Cali (Tuur)*** waxa uu sameeyey xukuumad Jamhuuriyadda cusub taladeeda mayalka u qabata. Cabdiraxmaan laftiisa ayaa madaxweyne loo doortay, ***Xasan Ciise Jaamac***na ku xigeenkiisa.

SNM waxa dhexdeeda ka dhaqan galay wax Soomaalida inteeda badan ka maqnaa oo illaa maantadaa qoyanna ka maqan: waa aqoonta iyo garashada loo xallilo khilaafyada, waa talo wadaagnimo, isu dulqaadasho iyo isu tanaasul marka ay timaaddo doorkaas xallinta khilaafaadka iyo wax wada gorfaynta wadareed geedka hoostiisa, iyada oo ka badbaaddey xilliyadaas fara-gelinta dibadeed ee candadawshay Soomaaliya.

SNM oo jabhad ah ayaa shan goor hoggaankeedu doorasho isu beddeley muddo 10 sannadood gudahood ka yar. Sidii aynu soo xusnay shan guddoomiye oo la doortay ayaa hoggaanka SNM isu kala beddeley. Inta badan taasi kama suurtowda oo kama dhex dhacdo jabhadaha hubaysan. SSDF oo SNM dhiggeeda ahayd waxa hoggaankeeda ku dhegey sidii maraboobta ama xanjada oo laga furfuri kari waayey *Cabdillaahi Yuusuf Axmed* (AHUN) oo wax ku galaaftay, isna jeel ku galay.

Sidaas daraaddeed, ayaa sidii distoorka SNM dhigay, waxa xukuumaddii Cabdiraxmaan Axmed Cali (Tuur) AHUN ay xukunkii iyo taladii ku wareejisay shacabka 1993.

Shirkii weynaa ee *Boorame* ayaa dhacay oo lagu soo dhisay xukuumaddii lagu doortay Alle ha u naxariisto'e *Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal* iyo ku xigeenkiisii *Cabdiraxmaan Aw Cali Faarax* (1993), mar labaadkiina (1997) ku xigeenkiisa *Daahir Riyaale Kaahin* oo markii dambena noqday madaxweynihii saddexaad ee Somaliland..

Maxamed X. Ibraahim Cigaal waxa uu yagleelay oo dhidibbada u taagey hay'ado iyo haykal qarannimo oo curdin ah oo ay la'aantii adkaan lahayd in si fudud loogu guulaysto yagleeliddooda. Cigaal waxa uu hirgeliyey abuuranka isirrada hay'adaha dawladnimo aasaaska u ah sida samaynta, ansaxinta (30-kii April 2000) iyo aftidii *distoorka* qaranka (31-kii May 2001), taabbagelinta iyo ka shaqaysiinta labada gole ee wakiillada iyo guurtida oo golihii ba ka kooban yahay 82 mudane, maxkamadda sare, furitaankii asxaabta siyaasadda iyo ku xadayntoodii saddexda xisbi qaran, wasaaradihii iyo hay'adihii dawladeed ee kale iwm.

Saddex xisbi qaran ayuu distoorku xaddiday, waxana xisbigii ugu horreeyey aasaasay ***Maxamed X. Ibraahim Cigaal.****UDUB* (*Ururka Dimoqraaddiga Ummadaha Bahawday*) ayuu yagleelay sannadkii 2000.Sannad ka dib, 2001, ayuu Eng. ***Faysal Cali Waraabe*** ku dhawaaqay Xisbiga *UCID* (*Ururka Caddaaladda iyo Daryeelka*). Wax yar ka dib, geeridii marxuun Cigaalna, 2002, ayaa ***Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo)*** hor kacay xisbiga *Kulmiye*.

Sannadkii 1996 waxa la beddelay calankii ku-meel-gaadhka ahaa ee dhexda ku lahaa goobada cagaarka ah ee tawxiidka giraanta ahi ku wareegsanaa (1991 – 1996).Waxa uu Cigaal soo jeediyey in calan rasmi ah qaranku yeesho.Calanku waa haybta siyaasadeed astaamaheeda mid ka mid ah oo muhiim ah, una baahan in uu macne iyo ujeeddo ku qotomo.

Maxamed Ibraahim Cigaal (AHUN) oo ahaa ruugcaddaa siyaasi ah, oo hab-raaca iyo maamuuska dawladnimo si wanaagsan u yiqiin, waxa uu garanayey taas iyo ahmiyaddeeda.Sidaas awgeed ayuu hindisahaas u keenay.

Doorka calanka cusub samayntiisa waxa qaatay oo madaxweyne Maxamed X. Ibraahim Cigaal (AHUN) u xilsaaray ***Muraad Cabdalle Mubaarak*** (AHUN) oo ahaa halyey reer Somaliland ah oo markaas ku noolaa Canada.***Saxardiid Shaacir*** oo ay Muraad wada kulmeen dharaarihii uu calanka cusub hindisihiisa ku foognaa, ayaa iiga warramay kulankaas.

Saxardiid waxa uu yidhi *"Muraad waxa uu ahaa halyey taariikh badan hayey.Waxa aan nasiib u yeeshay in aan la kulmo markii uu calanka hindisayey ee Cigaal u soo xilsaaray samayntiisa.Waxa aan ku martiqaaday gurigayga.Waxa la socdey* ***Xasan Cabdi Khayrre*** *iyo* ***Axmed X. Daahir Cilmi.*****"**

Saxardiid oo hadalkiisa sii wata *"****Muraad*** *waxa uu kor u halacsaday oo arkay tusmo tawxiidku ku xardhanaa oo fadhiga gurigayga meel ka sudhnayd.Waxa uu igu yidhi ma qaataa waan u baahannahaye.Waan siiyey, isla markiina gacanta ayuu ku sawiray calan weyn oo uu sitey.Laba cisho ka dibna calankii ugu horreeyey ee uu sameeyey, kuna tolay gacanta tawxiidka ku qoran, ayuu hadyad iigu keenay oo I siiyey*".

Saxardiid Shaacir waxa uu yidhi su'aal ayaan *Muraad* ka waydiiyey saddexda midab ee calanka, xiddigta madow iyo waxa uu casaanka hoos u mariyey?

Waxa uu yidhi waxa uu Muraad iigu jawaabey:

1. ***Cagaarka*** *tawxiidku ku xardhan yahay waa calankii Nebiga (NNKH),*

2. ***Caddaanku*** *waa nabadgelyo, xiddigta madoobina waa taariikhdii muqdiga ahayd ee aynu soo marnay*

3. ***Casaankuna*** *waa dhiiggii u soo daatay iyo kan gondaheenna ka socda, iyada oo wakhtigaasi aan weli soo afjarain dagaalkii sokeeye ee waddanka ka socdey!*

Calankan oo ah kan hadda 18-ka May loo dabbaal-dego ayaa halyeeygaasi soo sameeyey oo laga dooday, dabadeedna la ansaxiyey oo loo doortay calanka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland 1996.

Ibraahim Rashiid oo reer London ah ayaa ila soo wadaagey baal-taariikheed ku saabsan geeridii *Muraad Cabdalle Mubaarak* (AHUN). Muraad waxa uu ka soo jeedey qoys Carab-Soomaali ah oo Saylac ku lahaa martabad bulsheed iyo magac weyn.Boorame ayay u soo gureen qarnigii hore badhtamihiisii.1950 ayuu Muraad halkaas ku dhashay.Boorame iyo Hargeysa ayuu waxbarashada hoose ku qaatay.Biyo-dhacay ayuu ka baxay. Waxbarashada sare na waxa uu ku qaatay Talyaaniga iyo Jarmalka.

Farshaxan hiboole ah ayuu ahaa, hibadaas oo qoyskiisa oo dhan ku lammaan.Walaalkii ***Saami Cabdalle*** ayaannu isku fasal iyo saaxiibba ahayn sannadihii 1979 – 1983.Faarax Oomaar ayuunnu fasalkii "T" wada ahayn. Waxa uu ahaa farshaxan is nacay oo gobolka oo dhan u sameeya boodhadhka iyo kartoonnada, sawirrada cimilada iyo quruxda ku saabsan iwm.

Muraad waxa uu ka shaqeeyey Muqdisho.Waxa uu caan ku ahaa samaynta tigidhada iyo kartoonnada saxaafaddu adeegsato. Laba jeer ayaa Muqdisho lagu xidhay, ka dib markii taliskii milateriga ahaaka shakiyey farshaxameedyo uu gudbiyey iyo qalabyo-faneedkii uu adeegsadey. 1990-kii ayuu Sacuudiga u bayhoofay.Canada ayuu uga sii gudbey.1990-aadka dabayaaqadoodii ayuu dalka dib ugu soo laabatay.

Samaynta calanka marka laga tago, waxa uu Muraad hindisay tigidhada Somaliland lagu isticmaalo, farshaxanaynta lacagta shilinka Somaliland, samaynta astaamaha qaranka qaarkood, baasboorka Somaliland, khariidadda Somaliland ee muujisa tusaaleyaal badan oo la xidhiidha cilmiga juqraafiga iyo oogada dhulka, sida cimilada, degaanka, buuraha, khayraadka dabiiciga ah iwm. Hawlo kale na gacanta ayuu Muraad ku hayey markii uu geeriyoodey.

30-kii Oktoobar 2007 ayuu marxuun Muraad Cabdalle ku geeriyoodey caasimadda Hargeysa. Waxa uu ifka kaga tegey shan carruur ah: Saddex wiil iyo laba gabdhood. AHUN Muraad, Aamiin.

Heesta calanka:

Samo ku waar

Samo ku waar

Soomaalilaan…!

Waxa hal-abuurka midhaheeda iyo laxanka codkeeda ba sameeyey abwaankii weynaa ee ***Xasan Sheekh Muumin Gaafane (***AHUN) oo isna Oslo, Norway ku geeriyoodey sannadkii 2008.Sannadihii 1993 – 2002 ayuu madaxweynihii 2-aad ee Somaliland, Cigaal AHUN, hawshaas baaxadda leh ku hirgeliyey.

Halkaas ayay Somaliland ka sii guxuushisay markii uu Cigaal geeriyoodey May 2002, iyada oo hadda 24 jirsatey. Madaxweynihii saddexaad ***Daahir Riyaale Kaahin*** ayaa Madaxweyne Cigaal AHUN talada waddanka uga dambeeyey 2002-kii oo geeddigii sii ambaqaaday, kuna guulaystay in uu suurto geliyo nabad ku wada noolaan iyo qun-yar-socodnimo la wada mahadiyey oo doobir badnaan iyo digo-qaboobaan taariikhda baalasheeda dahabiga ah loogu weeleeyey.

Waxa uu *Daahir Riyaale* taabba geliyey qabsoomidda dhawr doorasho oo muhiim ahaa, sida kuwii golayaasha degaanka (2002), golaha wakiillada (2005) iyo kuwii madaxweynaha ee labada ahaa April 2003 iyo Juun 2010).

Madaxweynaha hadda talada haya oo ah kii 4-aad, Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo), oo doorashadii madaxweynaha ee 2003 ahaa murrashaxihii Xisbiga Kulmiye ee jagada madaxweynennimo waxa uu qaatay go'aan geesinnimo oo taariikhi ah, kuna soo noqnoqon doona sadarrada xog-reebta sooyaalka ummadda.

74 cod oo keliya ayaa Daahir Riyaale Kaahin kaga helay Axmed Siilaanyo doorashadii waddanka ka dhacday April 2003 oo ahayd doorasho taariikhi ah oo dad nus malyuun ahi codkooda ku dhiibteen oo ku kala siiyeen saddexdii xisbi qaran ee doorashadaas madaxweynaha ku tartamayey ee Udub oo helay codadkii la dhiibtey 42.8%, Kulmiye oo la siiyey 42.7% iyo Ucid oo hantay 15.8%.

Axmed Siilaanyo waxa uu soo gabagabeeyey muran qaro lahaa oo doorashadaas ka dhashay, iyada oo xukuumaddii markaas jirtey lagu eedeeyey wax-is-daba-marin codadkii la dhiibtay ku saabsaan.

Axmed Siilaanyo waxa uu maalintaas damaciisii qofnimo ka hor mariyey dantii qaranka iyo ummadda, una tudhay, waxanu oggolaaday natiijadaas doorashada ka soo baxday, isaga oo ganafka ku dhuftay oo ku gacmo-saydhay qolooyin xisbigiisa ka mid ah oo u soo jeediyey in aanu oggolaan natiijada oo laga dagaallamo. Ragga arrintaas ugu cadcaddaa oo badnaa waxa laga tilmaamaa foolaadkooda in uu ka mid ahaa Maxamuud Xaashi oo hadda ah wasiirka duulista iyo hawada.

Juun 2010 waxa dalka ka dhacay oo Daahir Riyaale suurta geliyey doorashadii labaad ee madaxweynaha oo saddexda xisbi qaran ku loollameen, waxaana cod aqlabiyad ah ku guulaystay xisbiga Kulmiye, waxana talada qabtay madaxweynaha hadda Axmed Maxamed (Siilaanyo)

Waxa Daahir Riyaale oo doorashadaas lagaga adkaaday ma guurtada iyo kaydka xog-reebta taariikheed u galay hal-ku-dhegga murtida weyn xambaarsan ee ah "wixii aan gacantayda ku

dhisay, gacantayda ku burburi maayaan". Maalintii doorashada madaxweyne Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) ka helay Juun 2010-kii ayaa Jaamac Yaasiin Faarax iyo Cismaan Cabdillaahi Cigaal (Hindi) oo xisbigiisii Udub madaxdiisa ka mid ahaa ku yidhaahdeen "Riyaalow, madaxweyne ha oggolaan natiijada doorashada oo aynu muran gelinno, isna waxba ka ma uu gurine, waxa uu ugu jawaabay hal-hayskaas diiwaanka galay. Nin ba tacabkii Togaay kaa maal!

Waa laga macaashay gooni isu taaggaas Somaliland iyo geeddi-socodkaas yagleelkeeda oo lagu ma khasaarin. Hase yeeshee lagu ma guulaysan in seeska loo dhigo oo la dhiso qarannimo sida muraayadda la isaga wada dhex arki karo oo lagu dhaqmo nidaam ku salaysan caddaalad iyo garsoor sharci hago oo banyaal ah ama daah-furan, tayo na leh.

Lurkii iyo dhibaatooyinkii shalayto wadajirkii Soomaaliya loo sadqeeyey ee waxdaddii lagaga baxay in badan oo ka mid ah ayaa weli Somaliland ka jira oo xoog ku leh.

Tusaale fudud: waxa shalayto in badan oo Reer Waqooyi ahi Reer Koonfureedka ku haaraamayeen in ay ka sedbursadeen saami iyo awood qaybsigii xilalka iyo jagooyinka muhiimka ah ee qaranka iyo taladiisa.

Dulmigu waa dulmi, caddaalad darro na waa caddaalad darro oo haddii nin kaa fogi kugu falo ama nin kuu dhowi kugu la kaco waa isku mid uun oo waxba uma dhexeeyaan.

Ka warran maanta Somaliland haddii taas oo kale ka jirto marka reer qudhihi *"Isaaq"* isku koobay oo isa siiyey madaxweynihii, labadii guddoomiye ee golayaasha wakiillada iyo guurtida, maxkamadda sare, taliyaha ciidamada, guddoomiyaha Bangiga, wasiirradii wasaaradaha naqwada ah sida arrimaha gudaha, dibedda iyo maaliyadda iwm.

Intaas marka laga tago ee la qiimeeyo 24 sannadood, lagu na dhereriyo halka aynu maanta taagan nahay waxa kuu soo baxaya sawir foolxun.

Maamul xumida sii gaammuraysa ee xukuumadda hadda talada haysa ee musuqeeda hantida ummadda iyo daalaadhacyeeda carradaas iyo camaarkaas ka batay, waxa baal yaalla oo soo raacaya oo naxdin kale leh mucaarad xumida iyana ina haleeshay ee indhobeelka ah iyo golihii guurtida ee lagu baxsan jirey ee khilaafaadka ka fogaan jirey oo hadda u muuqda gole isagu u hamuumaya hurinta khilaafyada iyo abuuridda xaalad xasillooni darro keeni karta, luminaysana doorkii dhexdhexaadnimada iyo odayaynta marka arrimo murugsani waddanka ku yimaaddaan sida hadda iyo doorashada muddo dhaafkeeda.

Qabyaaladda jaraha iyo xadhkaha goosatay ee carruurta, dhallinyada iyo haweenku suuqyada kaga hadaaqayaan ee odayga iyo siyaasigu sida xajiinta iyo naxliga leh horseedka ugu yihiin ee carrabka lagu wada ballaadhinayo ayaa u muuqata aafo shaki gelinaysa jiritaanka qaran iyo ummadnimo ee Somaliland.

Qabyaaladda iyo doco docaynteedu waxa ay Somaliland gaadheen heerkii ugu sarreeyey abid.

Haddii naxliga iyo kala shakiga shacbiga la xoojiyo, dib u dhaca iyo maamul xumiduna sii socdaan, waxa laga aamin bixi karaa qarannimada oo dabkeedu qaboobayaa, waxa na lumaysa kalsoonidii lagu qabi lahaa ummadnimada oo reernimo ayaa beddelaysa. Haddii reero loo kala dhaqaaqo na waa "karis xun iyadaa wax ku la' iyo caqligii lixdankii!"

Xukuumadda hadda talada haysa horteed ba qabyaaladdu way ku millayd nidaamkeenna dawliga ah, hase yeeshee weli heerkan ay maanta marayso weligeed ma ay gaadhin. Godkii qarannimada iyo ummadnimadaba waxa galay qabiilkii beelaha xoolo dhaqatadu nolosha ku maarayn jireen iyo qabyaalad.

Dareenkaas sillan ee qabyaaladda iyo naxligeeda huursan ayaa nolosha oo dhan dhankii la eegoba ka soo kabbacaya oo qudhunka qadhmuunkiisu ku jiidhayaa.

Maxamuud Sheekh Dalmar oo ka mid ah aqoonyahanka ummadda ayaa beri dhowayd isaga oo ka hadlayey madal wadareed London ah oo qaadhaan loogu ururinayey mashruuca waddada Ceerigaabo ayaa waxa hadalladiisii ka mid ahaa murtidan macnaha ballaadhan iyo aqoonta ku fadhida:

"*Waxa la wadaa horumarkii dusha oo waxa la dhisayaa waddooyinkii dalka magaalooyinkiisa isku xidhi lahaa, hase yeeshee waxa inaga kala daadsan oo kala furfuran waddooyinkii isku xidhi lahaa quluubta dadka*"!

Isaga oo sii wata ahmiyadda labada waddooyinba aadanaha u leeyihiin ayaa waxa uu Maxamuud tilmaamay in waddooyinka dusha maraa u baahan yihiin niis, sibidh, dhagxaan, biyo, daammur iwm oo aynu hadda ba halkan ku hayno, hase yeeshee waddooyinka quluubta dadka isku xidha ayaa ka sii muhiimsan dhismaha waddooyinka magaalooyinka isku xidha.

Waddooyinka quluubta iyo qalbiyada dadka isku xidhaa waxa ay u baahan yihiin buu mufekerku yidhi "Caddaalad, Naxariis iyo Xigmad" wada jira oo wada jaanqaada!

Maxamuud Sheekh Dalmar waa runtii oo waddooyinka quluubta dadka isku xidha haddii la kitfo oo qurub qurub loo kala jarjaro wax badan soo kordhin maayaan waddooyinka dusha ee maaddiga ah dhismahoodu, wax se muhiim ah in la xoojiyo dhismaha iyo tayaynta waddooyinka ruuxiga ah oo iyagu ah kuwa hadday hanaqaadaan fududaynaya dhismaha kuwa maaddiga ah, haddii kuwaas ruuxiga ahi tisqaadi waayaan oo burburaanna aanay wax badan soo kordhinayn ama ba ka suurto gelayn kuwan kale dhismahoodu.

Taas uu Dalmar ka tibaaxda bixiyey ayaa ah madhaafaan ah haddeerto iyo hadhowtoba.

Xukuumadda Axmed Siilaanyona waxa ay dayacday docdaas dhiirrigelinteeda, waxanay qaadday oo ay horseedday in la raaco wadiiqooyin qalqallooc iyo qodxaan badan oo jideeyey in qabyaalad iyo muusannowgeed ina dhega-barjeeyaan oo haweenkii iyo dhallinyaradii ka caagganaan jirey hirigooda qabyaaladeed koox koox iyo raabe raabe ugu qulqulaan godkaas mugdiga iyo naxliga badan ee qabyaaladda iyo qaradlayaasheeda ku awr kacsada ee hoggaamiyayaasha siyaasadeed iyo koofiyad-bacleyaashu kow ka yihiin.

Xitaa ayaan-darradu waa in siyaasiyiin badani u jabeen oo ay aaminsan yihiin ba in qabyaaladda iyo siyaasaddu aanay kala maarmi karin.

Gunaanadka Raadraaca Sooyaalka 26-ka Juun iyo 18-ka May ee Somaliland

Shantii sannadood ee u dambeeyey waxa talada shookaanteeda haya Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) oo wax badan oo wanaagsani u qabsoomeen, wax badani na weli ka qabyaysan yihiin, wax badanina ka murkacdeen amaba ka xumaadeen.

Runtu ma dhimato, beentu na ma dhammaato, si la mid ah, sida aanay guushu u dhiman, guul-darradu na u dhammaan!

Waa guul nabadgelyada iyo haykalka dawladnimo ee Somaliland u hanaqaadayaa, waa se guuldarro inaynaan weli beerin iniintii waddannimo oo dareenka reernimada iyo qabyaaladdu ku sii milmayaan nolosheenna siyaasadeed.

Dawladnimo la kala xigsadaa ayaayurka iyo yaabkeeda waa la soo arkay, haddii la isugu tarsheegta na waa cuyuban ka sii daran oo burburkeedu waa kaas raadkiisu sii qoyan yahay.

24 sannadood ka dib, in dareenka qabyaaladeed ka sarreeyo keenna waddaninnimo iyo in qabiilnimadu muquunisay ummadnimadii weeye libseeggeenna ugu weyni, waana marka godkii qarannimada iyo ummadnimada ay galaan qabyaalaadda iyo reernimadu, sida maanta aynu indhaheenna oo shan iyo shaahid ah ugu aragno, gude iyo dibad ba sida taban ee ynu qarannimada ula macaamilayno ee ula falgelayno. Waa taas ta hadalka soo celcelinaysaa.

18-ka May oo aynu maanta soo xusnay 24 guuradeedii waxa ay ka soo jeeddaa sooyaalkaas iyo geeddigaas dheer ee qori-isu-dhiibka ah ee jiilba jiilka ka dambeeya ku simayey sii ambaqaadka himilada, higsiga iyo ujeeddooyinkeeda ummadnimo iyo qarannimo xaqiijintooda iyo ka midho

dhalintooda ma dhaafaannimo iyo qabyadooda ku suntan joogtaynta iyo doorarka mar kasta ay tahay in gudinta loo hayo ayaa laga ma maarmaan ah.

Somaliland halka ugu bariyaysa Ceerigaabo iyo Sool ilaa iyo halka ugu galbeedaysa ee Salal iyo Awdal iyo inta ka dhex leh dadka ku nool ayay 18-ka May u dhaxaysaa. Distoorka Somaliland baa isna sidaas inoo wada siinaya xaq iyo xuquuq isku mid ah. Wixii guul ah aan isku bogaadinno, wixii inaga dhiman ama inaga khaldan na aynu dhinaca saxnaanta ula sii tukub-dhaqaaqno.

Waa hubaal oo tabashooyinku ma yara, gaar ahaan kuwa ka jira darafyada ee awood qaybsiga talada waddanka ku aaddani waa mutuxan ku habboon in hoos loo dhugtaa oo dib loo saxaa!

Hannaanka dawladnimo iyo maamul in la tayeeyaa oo xaaladda fadhiidnimo laga saaraa waa biyo-ka-dhibcaan kale.Madhaafaanku waa in la isu tanaasulaa, la wada tashadaa oo talo-wadaagnimadii lagu soo caano-maalay la xoojiyaa, si looga gudbo wixii khilaaf ah ee himilada qarannimo iyo higsiyadeeda kala dhantaalaya. Dadowna ogaada “nin xil qaaday inuu eed na qaaday, dulqaad na inuu wax weyn taro.

Dorraato (1960) markii la is raacayey ee Soomaali loo tegayey loo ma garraadayn oo caaddifad iyo jibbo ayaa wax kale oo kastaba ka qaalib ahaa.

Shalayto na (1991) markii gooni isu taagga la go'aaminayey na loo ma guulin, loo ma na garraadayn oo cadho gadhoodhay iyo ciil ayaa wax kale oo kastaba ka qaalib ahaa.

Maanta na cabsida jirtaa waa in mar kale si kale loo la fool hallaabi karo talada ummadeed marka caddaalad darrada iyo qaraabokiilka, nin-jeclaysiga, musuqa iyo boobka hantida qaran, sharci darrada iyo qabyaaladdu is biirsadaan oo wax kale oo kastaba ka qaalib noqdaan.

Caaddifad iyo cadho; jibbo iyo ciil, wax u dhexeeya baa jira oo waa adeegsiga caqliga toosan iyo in si maangal wax kasta oo yimaadda loo miisaamo qiimayn ahaan.

Si aan loo tacab khasaarin waa in caddaaladda la dhawraa. Sharciga iyo xeerka waraaqaha laga dul kiciyaa oo laga ciidanshaa, qarannimada ilmaynaysa na xaq lagu aamusiiyaa oo qabyaaladda la daadegaysa laga dhiciyaa!

Gooni isu taaggii Somaliland lagu ma khasaarin, lagu ma se guulaysan in boogtii la dhayo oo la daweeyo.Qabyo waa halkeedii.

Xaqu ma iisho waqiis, xaq-darradu na ma idlaato abid, si la mid ah, sida aanu wanaaggu u suulin abid, xumaantu na u sal-guurin waqeed!

• *Gobannimadu waa libin ku taxan, geeddi nololeede*

• *Waa gumaro aadmigu hantiyo, guusha ugu weyne*

• *Guddoonkeedu waa faral siyaal, loo gafaa jirine*

• *Ged uun buu ka leeyahay khalqigu, maalintuu gado'e*

• *marka uu gabaabsiyo xilliga, laga gu'weynaadey*

• *Ayuun baa ninkii gudan karaa , dhan ugu guuraaye*

• *Qabyadeedu waa guun intay, gaadho weligeede*

• *Galab noolba ooddeedu waa , gudinta loo hay-ye*

• *Nin gufeeya mooyiye ma jirin, ruux gunaanadaye*

• *Gelbiskeeda oo qudha hadduu, tacabku kuu gooyo*

• *Adigoo gadaashaday hadday , guure kugu dhaafto*

• *Gommodkiyo yaboohdeedu way, goora badataaye*

• *Haddii aan gantada loo adkayn, amase gaafaanta*

• *Guddo iyo waxay yeelataa, gulufo shaydaane*

• *Gaadaa dhexdeedaba ka kaca, maalin gelinkeede*

• *Gacmaa lagu xejaa amase way, galab dhaqaaqdaqye*

• *Waa lagu gam'aa amase way, geeri badisaaye*

• *Gob baa lagu noqdaa amase waa, lagu gumoobaaye.*

• *Garan maayo maalmaha intuu, soor gad leeyahaye*

• *Mar hadduu gidaad bahal qabaa, gaajo kula ciiro*

• *Gujo-dhaadhigeediyo hadduu, taabo gorofkeeda*

• *Waxba kama go'aan ruux ku shubay, xeedho gudaheede*

• *Hadduu gaar u maamulo qof, waa geel nin leeyahaye*

• *Inkastoo gantaal iyo wed iyo, gawrac lagu hooyo*

• *Meel loo gun-raaciyo haddaan, gogol dhig loo yeelin*

• *Mar haddaan garaad loo lahayn, wayska gubataaye*

• *Geedkeed ba'waa sixir haddaan, garasho liilayne*

• *Hadduu gaws dhurwaa ruugi karo, waa laf guri taalle!*

-Gudgude (Hadraawi)

mohamedbashe@hotmail.com

Dhammaad.